YAA U DIRSADAY HAWSHA?

DARAASAD: MARIN-HABAABINTA SIYAASADEED EE SOOMAALIDA OGADEN

MAXAMED C. GURXAN

Diseembar 2009

TUSMO

Hordhac 3

I. Dib u eega taariikhda 4
1. Itoobiyada taariikhiga ah 4
2. Khariidada siyaasadeed 5
3. Waxtarka taariikhda 6

II. Dalka yaa iska leh? 7
4. Dadaalkii boqorka 7
5. Doonistii dawladihii Soomaaliya 8
6. Duulaankii iyo qixii la diday 11
7. Dayradii dawladdii Dhargiga 13
8. Salku waa Dhanaan 13

III. Labada kee daw ah 14
9. Xoriyad-doon mise xaq-duudsi 14
10. Itoobiyada maanta 20
11. Dawladda Deegaanka Soomaalida 22
12. Hoygoo nabadaa lagu hodmaa 23

IV. Gabagabo 25

Biibliyograafiyada 26

HORDHAC

Labadii eef ee la soo dhaafay, siyaasadda Itoobiya, sida tan caalamka intiisa badanba, waxay gashay waayo cusub oo gabi-ahaanba dhan kasta ka baddalan kuwii ka horeeyay wakhtigaas. Markay talada waddanka la wareegtay jabhadda EPRDF sannadkii 1991kii, waxay meesha ka saartay nidaamkii xukunka-ursursan ee dawliga ah, oo lagu baddalay nidaamka xidhiidhka, iyadoo la sameeyay dawlad-deegaanno ku salaysan qawmiyadaha waddanka oo dhan, taladiina la qaybiyay.

Dadka Soomaalidu waxay markii ugu horaysay taariikhda Itoobiya fursad u heleen inay yeeshaan dawlad deegaan, loona aqoonsado muwaadiniin la xuquuq siman dadyowga Itoobiya intooda kale. Fursaddan qaaliga ah, oo dadka deegaanku aad u soo dhaweeyay, waxaa saluugay qaar ka mid ah jabhadihii siyaasadeed ee deegaanka ka jiray. Waxaana hormuud ka ahaa kuwan ku gacan-saydhay nidaamkan xidhiidhka JWXO, oo u hanqaltaagtay aayakatalin siyaasadeed oo degdeg ah. Laablakacan JWXO wuxuu horseeday isku-dhac iyo colaad sababtay xasuuq ba'an oo soo gaadhay dadkii rayidka ahaa ee deegaanka qaybo ka mid ah iyo waliba macaluul iyo diif xoog leh oo ku habsatay shacabkii reer guuraaga ahaa iyo iyadoo tuulooyin aad u badan dadkii degganaa ay dhammaadeen ama barakaceen. Waxayna xayirtay gargaarkii bani-aadanimada iyo waliba mashaariicdii horumarinta ee degmooyinka dhibku ka jiro.

Waxaa in muddo ahba waxgaradka deegaanku ka hadlayeen sharciyadda iyo danta shaqaaqada ay JWXO waddo iyo sidii loo soo afjari lahaa. Waxaan shaki ku jirin in colaaddanu aysan marnaba dan u ahayn dadweynaha deegaanka, balse ay tahay marinhabaabin iyo masiibo la soo daristay oo u baahan in lagaga hortago wadajir.

Inkastoo aan muddaba ka gaabsanayay inaan ka hadlo ama wax ka qoro arimaha siyaasadda, hadana damiirkaygu wuu i siin waayay inaan indhaha ka qarsado marin-habaabinta, darxumada iyo dulliga lagu hayo dadka deegaanka aan ka soo jeedo.

Siduu Ugaas Nuur Cubudhiye yidhi, "waayeel jiraaba waa innaga." Waxay ahayd in arinkan mar hore aad looga dhiidhiyo, balse goortii Eebbe na garansiiyaba waa goorteeda. Ma qabo in qofkii waxgaranayaa uu ka aamuso oo sugo dabargo'a dadkiisa.

Qoraalkan oo ka kooban saddex cutub iyo laba iyo toban qaybood, waxaan isku dayay inaan si kooban uga hadlo arrimo aad u badan oo haddii la faahfaahiyo buugaag laga qori karo mid kasta gaar ahaantiisa.

Ciwaanka, sida aad ku arki doonto gabagabada maqaalka, waxaan ka soo qaatay gabaygii "Yaa u dirsaday hawsha?" ee uu tiriyay Ustaad Cabdullaahi Macallin Axmed (Dhoodaan).

I. DIB U EEGA TAARIIKHDA

1. Itoobiyada taariikhiga ah

Waddanka Itoobiya sida ay qorayso taariikhdii waayadii hore ama dadka taariikhda baadha intooda badan ay xaqiijiyeen, qiyaastii wuxuu ugu horeeyaa waddamada adduunka ugu taariikhda dheer inta la ogyahay illaa hadda. Sida ay ku qortay Ann Gibbons buuggeeda *The First Humans* waxay ku waddaa in deegaankii ugu horeeyay ee bani-aadanku uu ka billowday waddanka Itoobiya. Raadraaca la qoray ee taariikhda Itoobiya wuxuu soo taxnaa illaa 3000CH ama in ka badan 5000 oo sannadood.

Taariikh ahaan waayadii billowgii Itoobiya waxaa loo yiqiin Kuush. Dhanka kalena Kuush ayaa loo yaqaanay Itoobiya. Inkastoo baaxadda dhul ahaan ee khariidada Itoobiyadii hore ay marar kala duwan isbaddallo ku dhacayeen qarniyo kala duwan, taas oo ay sabab u ahaayeen kolba cidda xukunka haysa, xarunta talada iyo hardankii ka dhexeeyey qowmiyadihii iyo qabaa'ilkii waddankaa ballaadhnaa, haddana wuxuu magacu midayn jiray dadyawgii Kuushka ahaa ee ku dhaqnaa Afrikada bari, dhulka baaxadda weyn leh ee dhanka galbeed ka jira Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed, kana soo bilowda agagaaraha Aswan (Masar) illaa iyo xeebaha Badweynta Hindiya ee waddamada Soomaaliya iyo Kenya hadda loo yaqaanno.

Sida uu Ibnu Mascuud ku qoray kitaabkiisii taariikhda ee la yidhaahdo "Seeradii Dahabka iyo Beerihii Jawharka" ama afka Ingiriiska loo yaqaan *Meadows of Gold and mines of gems* sannadkii 947CD, dadka reer Kuush waa farcankii Kuush oo ahaa ina Xaam. Dadyowga reer Kuush ee Bariga Afrika, oo af ahaan ka mida qoyska afafka *Afro-Asiatic languages* loo yaqaanno waxaa ka mid ah dadka hadda loo yaqaanno Soomaalida, Oromada, Cafarta, Sahoga, Bejaha, Rendiilaha, iwm.

James Bruce oo sannadkii 1770CD booqasho ku maray Itoobiya wuxuu qoray: "Waxaa ka jirtay Abissiiniya taariikh hiddoraac ah, oo sheegaysa in Kuush oo ahaa wiilkii Xaam, isaga iyo reerihiisii ay kor u soo raaceen wabiga Nayl illaa ay soo gaadheen banka Atbara, oo markaa aanay cidina degganayn. Hoos ayayna uga soo dhaadhaceen dushii, oo waxay degeen meesha la yidhaahdo Aksum (oo hadda ah Itoobiya), oo magaalo ka dhisteen. Muddo ka dibna waxay u guureen dooxada hoose oo ay degeen halka la yidhaahdo Meroe (oo hadda ah Suudaan).

Sida uu qorayo kitaabka loo yaqaanno *Mats'hafa Aksum* ama *The Book of Axum* taallada weyn ee Aksum ***The Great Obelisk of Axum*** waxaa qoray Kuush, si uu dhulkiisa astaan uga dhigo, oo waxaana halkaas ku aasan wiilkiisii *Ityopp'is* ama Itoobiya. Hase yeeshee, taariikhyahanada qaar waxay qabaan Kuush qudhiisa in la odhan jiray Itoobiya.

Taariikhyahanada Johann Michaelis iyo Rosenmuller waxay iyana qabaan sida ay qoreen Suuriyiintu qarnigii 5aad CD, in dadka Kuushku ay degganaayeen Badda Cas labadeeda dhinacba, iyagoo ku sifeeyay qabaa'ilka Ximyarite ee degganaa koonfurta Carabiya (Yemen) in ay ahaayeen Kuush ama Itoobiya.

Magaaladii la odhan jiray Meroe (waqooyiga Suudaan) ayaa ka mid ahayd xarumihii ugu horeeyay ee boqortooyadii Kuush ama Itoobiya sabaanadii u dhexeeyay 800CH ilaa sannadkii 350CD, oo ay boqortooyadii Aksum taladii waddanka la wareegtay, iyadoo xaruntii boqortooyada Itoobiya u beddeshay magaalada Aksum.

Markii uu kacaankii Islaamku uga soo tallaabay Badda Cas dhanka galbeed qarnigii 7aad wixii ka dambeeyay, gobolkii waqooyi ee Kuush waxaa saamayn aad u ballaadhan ku yeeshay Islaamka

iyo afka Carabiga, oo Nuubiyiinta oo ahaa qawmiyadda waqooyi ee Kuush ay inta badan qaateen. Waxayna Nuubiya ku milantay Carabtii dhulkooda ku soo duushay ee qabsatay.

Dabayaaqadii qarnigii 19aad Tewediros 2aad ee Abisiiniya wuxuu billaabay inuu boqortooyadiisa ballaadhiyo dhan kastaba isagoo dhulal badan hoos keenay xukunkiisa noqdayna imbiradoor. Gobolka Shewa waxaa markaa boqor ka noqday Xayle Melekot, oo isna wiilkiisii Amiir Sahle Maryam uga tegay dhaxalka boqortooyada. Amiir Sahle Maryam waxaa lagu caleemasaaray Imbiradoor Minilik 2aad 4tii Noofeember 1889kii.

Imbiradoor Minilik 2aad wuxuu la jaanqaaday dhul boobkii gumaystayaasha reer Yurub oo markaas duullaanno xoog badan ku soo qaaday qaaradda Africa. Isla sannadkaa uu xukunka qabtay wuxuu Talyaaniga la galay heshiiskii lagu khiyaanay ee Wujale (gobolka Wallo), oo oggolaanayay Talyaanigu inuu gumaysi kasamaysto gobolkii Eriterya ee waqooyiga Itoobiya, oo ka mid ahaa dhulkii dadka Tigreega ee ay xukunka iyo taageerada ka haysteen Raas Mengesha iyo Raas Caluula. Khiyaanadii heshiiskaasuna waxay sababtay dhawr dagaal oo Itoobiya ay la gashay Talyaaniga, waxaana ugu caansanaa dagaalladaas kuwii ka dhacay Amba Alagi, Maqale iyo Cadhwa, oo dhammaan lagu jabiyay ciidamadii Talyaaniga.

Imbiradoor Minilik 2aad wuxuu soo cusboonaysiiyay magacii waddanka isagoo ka dhigay Itoobiya magaca kaliya ee shaciga ah. Waxaa kaloo uu aasaasay sannadkii 1896dii magaalada Addis Ababa, oo uu ka dhigay caasimadda Itoobiyada cusub.

Markuu Imbiradoorku arkay in qaaraddii Africa la boobayo, oo gumaystayaal ka soo duulay qaarad kale ay qaybsanayaan, wuxuu sannadii 1891dii wareegto qeexaysa baaxadda iyo xuduudada dhulka Itoobiya u diray quwadihii reer Yurub ee Africa qaybsanayay. Inkastoo uu waddamadaas qaarkood xidhiidh wanaagsan la lahaa, haddana wuxuu isu arkayay inuu isagu yahay xukunka kaliya ee matali kara dadyowga Kuushka ee Afrikada waqooyi-bari. Waxayna dacwadiisu ku salaysnayd taariikh ahaan inay dadka Kuushku yihiin Itoobiya, xaqna uu u leeyahay inay isaga xukunkiisa hoos tagaan.

2. Khariidada siyaasadeed

Inkastoo ay jirto khariidad caalami ah oo waddamada adduunka intooda badan ay ansixiyeen, haddana isqabqabsiga iyo khilaafka siyaasadeed ee ugu badan caalamku waa midka ka dhasha khariidadaha aan laga heshiin ee ay samaysteen dawlado ama ururo siyaasadeed. Kuwaas oo meelo badan oo ka mid ah adduunka aad arkayso waddan khariidadiisa ku darsaday waddan kale oo ay daris yihiin oo xor ah, iyagoo sheeganaya in waddankaasu yahay gobol ay iyagu leeyihiin. Sidoo kale gobol ka mid ah waddan ayuu waddan kalena ku muujinayaa khariidadiisa inuu isagu leeyahay.

Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa Jamhuuriyadda Dadka Shiinuhu waxay u aragtaa waddanka Taywan inuu yahay gobol ay iyadu leedahay. Bakistaan waxay u aqoonsan tahay inay iyadu leedahay gobolka Kashmiir ee India. Jabhadda SPLM ee Koonfurta Suudaan waxay samaysteen khariidad ay ku muujinayaan inay yihiin waddan ka madaxbannaan Jamhuuriyadda Suudaan. Khariidadahan iyo kuwo kale oo badanba ma ahan kuwo la isku raacsan yahay ama sharci ahaan caalamku aqoonsan yahay.

Intii ka horaysay dabayaaqadii qarnigii 19aad, qaaradda Africa iyo caalamka intiisa badanba ma jirin khariidado siyaasadeed ama xuduuddo waddamo oo la isku raacsan yahay ama lagu heshiiyay. Laakiin xilligaa, oo ahaa markii ay gumaystayaashii reer Yurub qaybsadeen qaaradda, ayay sameeyeen khariidado siyaasadeed iyo xuduuddo ay ku heshiiyeen iyagu oo u kala qaybiya dhulalkii ay xukumayeen. Khariidadahan siyaasadeed ee Africa loo sameeyay, sida kuwa Aasiya

iyo Yurub qudheedaba looma eegin qowmiyad, qabiil, af, midab, diin, dhaqan ama dhaqaale ee sidii loo kala xoog roonaa, waddan walba intii uu qabsan karay ama haysan karay ayuu xayndaabtay oo xuduud u samaystay. Sidaas ayayna ku samaysantay khariidada siyaasadeed ee qaaraddu.

Markii uu soo afjarmay waayihii guumaysigu dhammaadkii dagaalkii labaad ka dib, Khariidada siyaasadeed ee qaaradda Africa iyo xuduudada waddammadii cusbaa ee xoroobay ma ahayn kuwo si dhib yar lagu sixi karo ama kuwo la sixi karo gabi-ahaanba. Sababta oo ah dadyow badan oo wax wadaag lahaa gumaysiga ka hor sida: af, diin, ama dhaqaale, ayaa la dhexdhigay xuduuddo. Haddii aan darisno khariidada siyaasadeed ee qaaradda, waxaan arkaynaa in qawmiyado ama qabaa'il aad u tiro badan ay qaybsan yihiin, oo inba ay waddan kale ka mid tahay. Waxay madaxdii qaaraddu u arkeen inaan taas laga heshiin karin ama wax la isku raaci karo uusan jirin. Haddii aan wax yar tusaale ahaan u soo qaadanno, dadka ku hadla afka Xawsaha waxay u qaybsan yihiin lixda waddan ee Naayjeeriya, Beniin, Burkina Faso, Kameruun, Gaana iyo Naayjer. Dadka ku hadla afka Sawaxiligu waxay degganaayeen Kenya, Tanganyika, Zanzibar, Kongo, iwm. Dadka ku hadla af Carabigu sidoo kale Masar, Liibiya, Aljeriya, Tuniisiya, Moroko, iwm. Taas ayaana keentay xeerka AHG/Res.16(I) ee dastuurka Ururka Midowga Africa, kuna saabsan khilaafka xuduudada waddamada Afrika, in ururku uu ku heshiiyo islamarkaana ku go'aasado, kalfadhigiisii caadiga ahaa ee 1aad ee madaxda waddamada iyo dawladaha Afrika ee lagu qabtay Qaahira, Masar, bishii Luulyo, sannadkii 1964kii, in xuduudada waddamada Afrika loo daayo sidii uu gumaysigu kaga tagay, intii uu Africa soo foodsaari lahaa khilaaf waara iyo colaad burburisa waddamada markaa uun xoroobay ee nabadda iyo horumarka u baahnaa.

Mushkiladda la xidhiidha khariidadaha siyaasadeed, ma ahan mid ku kooban qaaradda Afrika oo kaliya, balse waa mid ka taagan caalamka intiisa badan. Haddii waddanka Jarmalku uu sheegto inuu isagu leeyahay waddamada ama dadyowga afka Jarmalka ku hadla ee dariskiisa ah oo idil, waxaa qaaradda Yurub soo foodsaaraya khilaaf siyaasadeed oo xoog leh, sidii kii dagaalkii labaad oo kale. Waayo, waddamada Awsteriya iyo Switserland oo ah waddamo xor ah, inta badan dadkoodu waxay ku hadlaan afka Jarmalka. Sidoo kale haddii Faransiisku ay islahaysiiyaan waddamada ama gobolada ay deriska yihiin ee ay isku afka yihiin, waxay taasi keenaysaa iska horimaad iyo hardan culus. Sababtoo ah, waxaa cidhiidhi galaya jiritaanka waddamo sida Beljim iyo Switserland. Hase yeeshee, tan iyo intii uu xoogaystay Midowga Yurub, daraasaadka la sameeyay sannadaha 2004/2005 waxaa xaqiiqoowday in waddamada Yurub ay ku dadaaleen xal waara in loo helo khilaaf dambe oo ka dhasha khariidad siyaasadeed.

Waa arrin aad u adag, amaba aan suurtagal ahayn dunida maanta, in xoog wax lagaga baddalo khariidad siyaasadeed ee waddan jira. Sida uu qabo Heshiiskii Nabadda ee Kellogg-Briand (ama Heshiiskii Baariis) ee sannadkii 1928dii ee lagu sii bayaamiyay Xukunkii Caalamiga ahaa ee Nuremberg sannadkii 1948dii, cidina waddan dhul xoog kagama qaadan karto, kumana haysan karto xoog ciidan. Tanu waxay ina baraysaa inaan waxba laga baddali karin xuduud waddan ama khariidad siyaasadeed ee waddan, ama gobol ka mid ah waddan, haddii aanay heshiis nabadeed ka gaadhin ama aanay ku dhammaynin is afgarad siyaasadeed dhinacyada isku hayaa.

3. Waxtarka taariikhda

Marka aynu si dhab ah, oo daacadnimo ummadeed ku jiro, u doonayno inaan xallinno qulub siyaasadeed waxaa lagama maarmaan ah inaan marka hore si qoto-dheer oo cilmiyaysan u darisno dhibaatadu halka ay ka timid, waxa ay salka ku hayso, goorta ay billaabatay, sidii ay ku billaabatay, iwm. Marka aan xogtaa hello ee waxaas oo dhan ogaanno kadib ayaan haddana falanqayn karnaa sida ugu habboon ee loo xallin karo dhibkaa, sida ay danta ummaddu ku jirto,

xalku cidda uu la jiro ama laga heli karo, tallaabooyinka loo baahan yahay in la qaado iyo goorta ku habboon, iwm.

Si loo salgaadho ilaha qulub siyaasadeed, waa in marka hore dib loogu noqdo taariikhdii ummadda. Waana in la darso dabciga bulsho ahaanteeda, dhaqankeeda, siyaasaddeeda iyo deegaankeeda (social, cultural, political and physical anthropology), inkastoo aynaan tan hadda si faahfaahsan ku wada falanqayn karin halkan. Waa in dib loo raadraaco soo ifbixii iyo isbadbaddalkii juqraafi ahaan khariidadeeda, tan dhaqaale iyo tan siyaasadeed ee heer gobol ama deegaan iyo dadyowga deriska la ah ee ku xeeranba.

Taariikhdu sideedaba waa sheeko ku saabsan wixii ku dhacay ama soo maray qof, qabiil, qaran ama ummad. Waa sheekada colaadihii, nabaddii, masiibooyinkii, badhaadhihii, horumarkii, dubu-dhicii, xukuumadihii, xukun la'aantii, wanaaggii, xumaantii, luggooyadii, laxaadsigii, jabkii, kabashadii, dhisiddii, burburkii, iwm. Taariikhdu waxay muhiim u tahay horumarka bulshada, caddaaladda bulshada, ammaankeeda iyo xasiloonideeda; midnimadeeda iyo waliba jiritaankeeda.

Dadkii aan taariikhdooda aqoonu, isma yaqaanaan iyagu, mana yaqaanaan lafahooda. Dadka aan aqoon wixii soo maray, ma garan karaan waxa jooga ama waxa soo socda midna. Sidaasna dadnimadoodu maba ahan mid dhamaystiran. Taariikhda waxaan ka baranaa khaladaadkii ina soo maray, oo aan dib u saxnaa, si aynaan ugu noqon mar kale.

Dadka aanay taariikh ahaan u diiwaangashanayn gafafkii iyo gadaafooyinkii soo maray iyo sidii loo xalliyay, waxaa joogto u noqda in taariikhdu ay hadba ku noqnoqoto dhacdooyin namuun iyo raad is shabaha leh. Tan macnaheedu waxaa weeye, haddii aan dhacdo loo xallinin sidii ugu habboonayd, islamarkaana aan laga feejignaan, lagana reebin jaantus waara, waa hubanti inay soo rogaalcelin, wajigay doonto ha lahaatee.

Taariikhda kama baranno baladii iyo baaskii soo dhacay oo kaliya, waxaa kaloose aan ka baranaa caqligii, xikmaddii iyo afkaartii wanaagsanaa ee ay lahaayeen ama adeegsadeen dadkii naga horeeyay. Marka aan taariikhdeenna dib u eegno, ee aan aragno waxyaabihii ay aabbayaasheen ama awoowayaasheen sameeyeen, waxaan awood u yeelanaynaa inaan waxaas darisno, ka fekerno, oo qiimayno. Qiimayntaasu waxay sababi kartaa inaan siday wax u sameeyeen u aragno khalad, ama inaan u aragno in sidaasi ay iyaga anfacday, laakiin aanay innaga ina anfici karin. Waxaan u arki karnaa siday wax u sameeyeen waagaasu inay dan u ahayd marxaladdii ay iyagu ku jireen, laakiin aanay dan inoo ahayn innagu marxaladda aynu hadda ku jirno. Sidaa darteed, inaan taariikhdeenna dib ugu noqonno, oo barano, waxay lagama maarmaan u tahay nolosheenna iyo jiritaankeenna hadda iyo mustaqbalka ubadkeenaba.

II. DALKA YAA ISKA LEH?

4. Dadaalkii boqorka

Dagaalkii labaad markii lagu jabiyay dawladdii Musolini ee faashiistigii Talyaaniga, Itoobiyana laga saaray ciidamadiisii soo duulay, wuxuu Imbiradoor Xayle Sellasse ka billaabay caasimadda iyo dhammaan goboladii Itoobiya, inuu dib u habeeyo, oo hab cusub u dhiso maamulkii imbiradooriyaddiisa.

Isagoo ka duulaya siyaasaddiisii cusubayd ee ku salaysnayd waaya-aragnimadii uu soo korodhsaday sannadihii dagaalka Talyaanigu uu socday ee uu ku sugnaa Yurub, wuxuu Xayle Sellasse socdaal ku kalabixiyay goboladii Itoobiya.

Wuxuuna imbiradoorku 25kii bishii Agoosto, 1956dii socdaal ku tagay degmada Qabridahare ee deegaanka Soomaalida Itoobiya (Ogaden). Halkaasna wuxuu kula kulmay madax-dhaqameedyadii dadka Soomaaliyeed ee deegaanka, isagoo khudbaddiisii taariikhiga ahayda u jeediyay dadweynihii degmadaas. Waxyaabihii uu khudbaddiisa carabka ku dhuftay, isagoo ka duulaya, tilmaamayana taariikhdii Itoobiya, waxaa ka mid ahaa; in dadka Soomaalidu ay qayb ka yihiin Bahwaynta Reer Itoobiya. Wuxuuna odorosay horumarka mustaqbalka ee Soomaalidu in uu la jiri doono Itoobiya.

Booqashadaasi Xayle Sellesse oo dhinacyo badan taabanaysay waxaa ka mid ahaa ujeedooyinkeeda: in dadka deegaanka uu ku dhiiri-galiyo inay ka qaybgalaan doorashooyinka waddanka; inay ku biiraan hawlwadeenada dawladda iyo ciidamada; in degmooyin cusub la sameeyo; in deegaanka la maalgaliyo lagana hirgaliyo mashaariic horumarineed oo bulshadu leedahay; in laga furo deegaanka dugsiyo waxbarasho iyo rugo caafimaad; iwm.

Wuxuuna furay dugsiga dhexe ee magaalada Qabridahare, oo ahaa goobtii ugu horaysay ee waxbarasho casri ah oo laga furo deegaanka. Dugsigan oo lahaa hoy iyo cunto lacag la'aan ah, waxaa kaloo ardayda ay dawladdu ka caawinaysay agabka waxbarashada oo idil.

Sidoo kale wuxuu furay isbitaalka Qabridahre, oo isna ahaa kii ugu horeeyay uguna weynaa ee deegaanka laga furo. Isbitaalkanu wuxuu lahaa qaybaha kala duwan ee caafimaadka iyo bukaan-jiif. Wuxuuna imbiradoorku kafaalaqaaday kharashka isbitaalka, bukaan iyo daawadaba.

Dhanka kale wuxuu Xayle Sellasse dadweynaha deegaanka u soo bandhigay qorshihiisii mashruuca dibu-dejinta beeraleyda ee dooxada wabi Shabeelle. Kaas oo uu sheegay inay dawladdu diyaar u tahay inay dadka deegaanka uga dhisto biyo-xidheenno iyo kanaallo waraabka beeraha wabiga Shabeelle.

Wuxuu imbiradoorku ballanqaaday inuu taageero hiil iyo hooba siinayo dhalinyaradii uu horkacayay Cabdinaasir Xaaji Maxamuud ee Xisbigii Nasrullaah, oo billaabay Shirkaddii Ganacsiga Ogaden, kuna talajiray inay furaan bangi horumarinta ganacsiga deegaanka.

Wuxuuna magacaabay dhawr iyo toban degmo oo cusub, oo uu gudoomiyayaal uga dhigay qaar ka mid ah madaxdhaqameedyadii deegaanka sida ugaasyadii iyo salaadiintii macruufka ahaa. Masuuliyiin kalena wuxuu u magacaabay xilal kala duduwan oo dhinacyada sharciga iyo maamulka.

Xilligaas wuxuu imbiradoorku xogogaal u ahaa fadqalaladii iyo abaabulkii xisbiyadii SNL iyo SYL ee Hargeysa iyo Muqdisho, oo kacdoon ka waday deegaanka Soomaalida ee gudaha Itoobiya. Xisbiyadaas oo isku waday inay talada Jamhuuriyadda cusub ee Soomaaliya qabtaan, waxay ku andacoonayeen in dadka Soomaalida ah oo idil la israaciyo, oo hal waddan, oo taladooda hoos yimaadda laga dhigo. Waxaana ay taasu ku qeexnayd dhambaalkii ay labada xisbi qoreen iyo khudbaddoodii laga akhriyay shirkii Qaramada Midoobay ee Jineefa 1950kii. Sidaa aawadeed, ayuu Xayle Sellasse billaabay inuu isna dadkiisa kasbado, si aan loo duufsan, oo loogu adeegsan.

5. Doonistii dawladihii Soomaaliya

Bishii Luulyo, sannadkii 1959kii, Cabdullaahi Ciise, oo noqday ra'iisal-wasaarihii ugu horeeyay ee Soomaaliya, markuu sharxayay barnaamijkii dawladda ee uu u soo bandhigay golihii Soomaaliya, wuxuu mudnaanta koowaad siiyay waxa uu ugu yeedhay, midaynta dhulka Soomaalida ee la kala raaciyay waddamada kala duwan. Sidoo kale ninkii isaga ka dambeeyay oo ahaa Cabdirashiid Cali Sharmaarke, ayaa isna ku tilmaamay xuduudada ay Soomaaliya la

leedahay waddamada deriska la ah, mid been ah oo aanay aqbali karin. Isagoo ballanqaaday in ay dawladdiisu wax kasta ka hormarin midaynta iyo isukeenidda dadka Soomaalida ah oo idil.

Hase yeeshee, aragtida siyaasadeed ee noocaas ah, oo runtii ahayd damac seeflaboodnimo, waxay ahayd mid lagu degdegay, oo aan aad looga fiirsan cawaaqibka ay yeelan karto. Sababta oo ah, waxaa muuqata inaan loo aabbayeelin ama aan tixgelin la siin arrimahan soo socda:

1. Rabitaanka muqaddaska ah ee dadka Soomaalida ah ee ku dhaqan waddamada deriska la ah Soomaaliya, ee la leeyahay waa la xorayn, oo waxaa lagu soo darayaa Jamhuuriyadda Soomaaliya, iyagoo aanay cidina kala tashan doonistooda, balse la adeegsanayo kooxo yar oo siyaasiyiin ah;
2. Rabitaanka dadweynaha iyo waxgaradka Jamhuuriyadda Soomaaliya oo aan la hubsan, waxna laga waydiin tallaabooyinkaa halista ah ee ay qaadayeen dawladuhu;
3. Danaha dhaqaale iyo siyaasadeed ee ka dhaxayn kara Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo waddamada deriska la ah caqabadda ku iman karta iyo saamaynta ay yeelan mustaqbalka;
4. Jamhuuriyadda Soomaaliya oo ahayd waddan sabool ah, oo markaa uun xoroobay, una baahnaa horumar dhan kasta ah, balse aan jar-iska-xoor siyaasadeed u baahnayn;
5. Saamaynta ay yeelan karaan heshiisyadii hore looga gaadhay xuduudada Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo waddamada deriska la ah xilligii gumaysiga;
6. Heshiisyada caalamiga ah ee khariidadaha iyo xuduudada caalamiga ah;
7. Cududda dhaqaale iyo ciidan ee waddamada wax la jiraan;
8. Taageerada caalamiga ah ee ay Jamhuuriyadda Soomaaliya u heli kartay inay hesho dhulalka ay sheeganaysay;
9. Xaalka xuduudada kale ee caalamiga ah ee qaaradda Afrika iyo sida ay isu saamaynayaa;
10. Maslaxada iyo danta guud ee qaaradda Afrika, iyo gaar ahaan tan Geeska Afrika.

Si kastaba ha ahaatee, laablakaca siyaasadeed ee xoraynta iyo midaynta Soomaali wayn, kuma ekayn Cabdullaahi Ciise iyo Cabdirashiid Cali Sharmaarke, balse waa ay ka midaysnaayeen inta badan hogaamiyayaashii Jamhuuriyadda Soomaaliya. Taasina waxaa markhaati ka ah khudbaddii Maxamed Ibraahim Cigaal uu ka jeediyay meesha la yidhaahdo Laan Mulaaxo oo Hargeysa u dhow, bishii Juun ee sannadkii 1960kii.

Cigaal oo markaas ahaa badhasaabkii Somaliland, wuxuu khudbaddiisa ku caddeeyay in aanay marnaba aqoonsanayn heshiiskii xuduudda British Somaliland iyo itoobiya ee 1954tii loona yiqiin Anglo-Ethiopian Treaty. Heshiiskaas oo dhulka Hawd loo yaqaan u aqoonsaday inuu ka mid yahay dalka Itoobiya. Cigaal wuxuu ku andacooday in dhulkaasi ay leedahay Somaliland, ayna waajib tahay in ay dib u soo ceshato. Dhulka uu Cigaal sheegtay ma ahan dhammaan dhulka deegaanka Soomaalida Itoobiya, balse waa jeexa bari ee ku dhereran xuduudda Somaliland, oo ballaciisu aanu ka weynayn ilaa 150km gudaha Itoobiya.

Inkastoo dadweynaha Soomaaliyeed loogu sheegayay, dad walaalihiin ah iyo dal Soomaaliyeed baa la xoraynayaa, taas oo ahayd wajiga siyaasadda abaabulka iyo kicinta bulshada, haddana waxaa xaqiiqo ah in doonista dhabta ah ee qarsoonu ay taas aad uga duwanayd, ugana fogayd. Danta dhabta ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ay ka lahayd ololayaashii marin-habaabinta ahaa ee xoraynta ku wajahan deegaanka Soomaalida Itoobiya (Ogaden), waxay ahaayeen gebi-ahaanba kuwo ku salaysan danaheeda dhaqaale iyo walwalka ay ka qabtay saamaynta uu gobolkanu ku yeelan karo horumarkeeda mustaqbalka. Walbahaarkan dhaqaale wuxuu si toos ah ula xidhiidhay qorshayaashii Xayle Sellasse ee ku wajahnaa dib-u-dajinta dadweynaha deegaanka Soomaalida Itoobiya ee uu ku carabbaabay khudbaddiisii magaalada Qabridahare ee sannadkii 1956dii.

Dabayaaqadii kontomeeyadii, waxay imbiradooriyaddii Xayle Sellesse dejisay laba qorshe oo la xidhiidha horumarinta deegaanka Soomaalida Itoobiya. Labadaa qorshe oo ku salaysnaa ballanqaadkii

uu ka sameeyay magaalada Qabridaharre, waxay kala ahaayeen: 1. In dadka deegaanka ee xoolo dhaqatada ah loo sameeyo seerooyin daaqsin iyo ilo biyood oo ay u baxsadaan xilliyada jiilaalka iyo xagaaga si ay uga samatabaxaan haddii roob yaraan ama abaaro ay yimaadaan. Taas oo sahlaysay in dawladdu ay fursad u hesho inay kala soocdo dadka deegaanka iyo kuwa waddamada deriska, sida dadka ka imanaya Soomaaliya. Waxaa kaloo qorshahanu uu fududaynayay in xoolaha nool ee deegaanka ay dadka deegaanka iyagu doofiyaan kana ganacsadaan. 2. In qayb weyn oo ka mid ah dadka deegaanka laga dhigo beeraley iyadoo la dejinayo dooxada webi Shabeelle inta u dhaxaysa Iimeey iyo Qalaafo, isla markaana laga dhisayo webigaas saddex biyo-xidheen oo waaweyn. Kuwaas oo kala ahaa, biyo-xidheenka koronto-dhalinta ee Melka Wakanna (Arsi), biyo-xidheenka Kuldhaash (Iimeey) ee biyo-kaydinta iyo biyo-xidheenka Galbeedka Godey (Godey) ee waraabka. Waxaa kaloo la qorsheeyay dhismaha magaalada Godey, oo la rabay inay noqoto xarun wax-soosaar warshadeed, looguna talagalayay in la dejiyo nus malyuun qof oo dadka deegaanka ka mid ah. Saddexdaas biyo-xidheen iyo Godey marka la dhameeyo waxay dejin lahaayeen in ku dhaw hal malyan iyo badh oo dad ah. Waxaana dhici lahayd in biyaha wabi Shabeelle afar meelood saddex aysan ka bixi lahayn Itoobiya. Taas oo keeni lahayd dhul-beereedka ugu weyn ee waxsoosaarka beeraha iyo warshadaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, oo ah dhulka uu maro wabi Shabeelle in uu noqdo dhul daaqsin ah, oo aanay waxba ka soo bixin.

Maadaama dhaqaalaha Jamhuuriyadda Soomaaliya inta badan uu ku tiirsanaa ganacsiga iyo xoolaha iyo mashaariicda wabi Shabeelle, haddii labadaas mashruuc ee ganacsiga iyo xoolaha iyo wabi Shabeelle ee Imbiradoor Xayle Sellasse ay hirgali lahaayeen, sidii uu hore u sii sheegayba horumar dhaqaale oo Jamhuuriyadda Soomaaliya ay samayso wuxuu ku xidhnaan lahaa hadba xidhiidhka ay dawladda Soomaaliya la leedahay waddanka Itoobiya.

Marka aan ka hadlayno danta dadka deegaanka Soomaalida Itoobiya (Ogaden), waxaan halkan ka arkaynaa farqiga u dhexeeya siduu Xayle Sellasse ugu dadaalayay inuu dadkiisa horumariyo iyo doonistii Jamhuuriyadda Soomaaliya ee ku salaysnaa danaheeda dhaqaale. Waydiintayda ciwaanka cutubkan ee ah, dalka yaa iska leh? Jawaabteeda waxaan kuu daynayaa adiga, akhristoow!

Hadalladii ka soo yeedhay madaxdii Jamhuuriyadda Soomaaliya, ee ku wajahnaa in qas iyo qalalaase la galiyo waddamada dariska la ah, ma uusan ahayn afgobaadsi siyaasadeed ee wuxuu ahaa, sidaan hore u soo xusnay, ka hortag naflacaari ah, oo haddana aan qorshe rasmi ah iyo taageero gudaha iyo dibadda midna haysan. Taasina waxaa markhaati ka ah dagaalkii maalmaha socday ee sannadkii 1964kii ka dhacay Togwajaale.

Horaantii sannadkii 1963dii, iyadoo ka duulaysa warbixin sir ah oo uu keenay Cumar Carte Qaalib, kuna saabsan mashruuca wabi Shabeelle ee ay fulinayso dawladda Itoobiya iyo saamaynta uu ku yeelan karo dhaqaalaheeda, waxay dawladdii Jamhuuriyadda Soomaaliya ururisay koox dhalinyaro ah, oo qaarkood ay ka soo jeedeen deegaanka Soomaalida Itoobiya. Kooxdaas oo madax looga soo dhigay nin la yidhaahdo Siyaad Xaaji Maxamuud, ayaa la soo siiyay lacag shillin Soomaali ah oo dhan saddex boqol oo kun iyo laba boqol oo qorigii la odhan jiray dhoombirka ah. Waxaana loo soo diray inay galaan gudaha deegaanka Soomaalida Itoobiya, oo shir ku qabtaan, kuna dhisaan jabhad. Balliga la yidhaahdo Xodayo, oo ku yaalla ciidda Doollo, ayuuna shir afduub ah ku qabtay Siyaad Xaaji Maxamuud, isagoo ku dhistay halkaa jabhad uu isagu madax ka yahay, dadkuse aad u diidanaa. Dhoodaan baa yidhi: “Hadba tuug hunguri doonayaa wuxuu, harag u jiidaaba”.

Siduu heshiiska ku soo galay Siyaad X. Maxamuud, waxay ahayd inuu marka ugu horaysa weeraro mashruuca dooxada wabi Shabeelle, oo muddo gaaban ay ka shaqaynaysay daraasaddiisa iyo dhisme billow ah shirkad waddanka Israa’iil laga leeyahay. Kooxdii uu Siyaad Xaaji watay, oo uu ku magacaabay Jabhadda Xoraynta Soomaali Galbeed, ayuuna la aaday dooxadii wabiga, halkaas oo uu weerarkiisii ugu horeeyay ku qaaday dhismihii cusbaa ee machadkii daraasaadka wabi Shabeelle oo

markaa laga billaabay meeshii la odhan jiray Goday. (Wakhtigaas ma aysan jirin magaalada Godey). Waxayna gubeen oo baabi'iyeen gebi-ahaanba dhismihii mashruuca oo idil.

Fadqalalaha ay ka ridday kooxdaas Siyaad Xaaji deegaankuna, waxay keentay in dawladdii Itoobiya ay u diyaar noqoto dagaal ay la gasho kuwii soo abaabulay. Bishii Febraayo sannadkii 1964tii ayayna dagaal toos ah isaga horyimaadeen ciidamadii Imbiradoor Xayle Sellasse iyo kuwii Jamhuuriyadda Soomaaliya tuulada xadka ah ee Togwajaale. Dagaalkaasu wuxuu socday dhawr maalmood markii ay dib u gurteen ee meesha banneeyeen ciidamadii Jamhuuriyaddu. Waxaana khilaafkaas lagu dhammeeyay dhexdhexaadin ay bishii Abriil samaysay dawladdii Suudaan. Dagaalkaas oo ahaa guul-daradii ugu horaysay ee laablakicii marin-habaabinta ahaa ee dawladihii Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Kooxdii Siyaad Xaaji waxaa lagu daray ciidankii xoogga dalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, iyadoo waliba ragga dhalinyarada ah ee shaqo la'aanta ah, ee ka yimaadda deegaanka Soomaalida Itoobiya lagu dhiirigaliyay inay ku biiraan ciidamada. Taas oo ka dhigaysa inay yihiin muwaadiniin Jamhuuriyadda Soomaaliya. Hase ahaatee, ragga waayeelka ah, haweenka iyo caruurta waxaa la qori jiray laaji ama qaxooti, waxaana loo furay xafiis lagu magacaabay "Danaha Soomaaliyeed". Waxay dad badanu is waydiin jireen, shariga lagu saleeyay in laba is dhashay ama wada dhalatay, oo isku mar soo wada gashay waddan, midna in loo aqoonsado waddani, kan kalena laga dhigo ajnabi.

Sida ka muuqata xogta aan kor ku soo sheegnay, siyaasiyiintii Hargeysa iyo Muqdisho midba dan u gaar ah ayuu lahaa. Siyaasiyiintii Soomaaliland waxay doonistoodu ahayd dhulka Hawdka oo ay u arkayeen daaqsin aanay ka maarmin iyo xoolaha nool ee deegaanka Soomaalida (Ogaden) oo dhaqaalahoodu, gaar ahaan dakhliga ganacsiga dhoofintu si weyn ugu tiirsanaa. Siyaasiyiinta koonfurta Soomaaliya ee Muqdisho doonistoodu waxay ahayd biyaha wabiyada, gaar ahaan wabi Shabeelle, oo waxsoosaarka beeraha iyo warshaduhu inta badan ku tiirsanaayeen biyaha wabigan.

Beesha Absame, oo ahaa xooggii ugu badnaa ee dawladihii Jamhuuriyadda Soomaaliya ay u adeegsanayeen ololohoodii ay ugu magac dareen gobonimodoonku, dhiggoodii kale ee koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan gobolada Gedo, Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose waxay isla dawladahaasu ku hayeen cadaadis, xaqiraad, barakicin iyo dhulboob.

Waxaa laga barakiciyay intii u dhaxaysay 1961kii illaa 1990kii dad ka badan boqol kun degmooyinka Kismaayo, Afmadow, Jamaame, Badhaadhe, Jilib, Xagar, Bu'aale, Saakow, Dujuuma, Baardheere iyo Faafaxdhuun. Waxaana si joogto ah loogu beerayay degmooyinkaas dad laga soo raray gobollo kale.

Haddii qayb ka mid ah beeshan laga xoraynayay Itoobiya, qaybta kale ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ka midka ahaydna ma iyadaa la iska xoraynayay? Jawaabta adigaan kuu dayn akhristow.

7. Duulaankii iyo qixii la diday

Sannadkii 1969kii, markay taladii Jamhuuriyaddii Soomaaliya la wareegeen kooxdii askarta ahayd ee uu hogaaminayay Janaraal Maxamed Siyaad Barre, dadka siyaasadda Soomaaliya u dhuundaloolaa ma aysan filayn wax horumar siyaasadeed ah inay keeni karaan kooxda xukunka maroorsatayu. Waxaa la odorosayay in hardan xukun doon uu ka billaaban doono dhexdooda, taas oo muddo gaaban gudaheedba soo ifbaxday markii bishii Abriil 1970kii xilka laga qaaday, isla markaana xabsiga loo taxaabay Jeneral Jamac Cali Qorsheel. Waxaana ku xigay Lulyo 1972dii markii Jeneral Caynaanshe iyo Jeneral Salaad Gabayre oo ka mid ahaa xafiiskii siyaasadda ay isku dhaceen Maxamed Siyaad. Maadaama uu ahaa nin aad u xukun jecel, labadan sarkaalna uu uga baqay inay cidhiidhi galiyaan xukunkiisa, isla markiiba wuxuu ku xukumay dil toogasho ah, oo uu ku fuliyay. Middaa oo u gogol-xaadhay inuu ku kaliyaysto talada waddanka, siduu dan moodana ka yeelo isaga kaligii.

Abaartii Dabadheer ee sannadkii 1975tii, oo caydhtaysay dadkii xoola-dhaqatada ahaa ee ku noolaa Geeska Afrika guud ahaan, waxay sababtay in dawladihii Soomaaliya iyo Itoobiya labaduba ay sameeyaan barnaamijyo dibudajin, oo dadkii xooluhu ka dhammaadeen la dajinayo dhul beereed ay wax kasoo saartaan. Soomaaliya waxaa ka billowday barnaamijkii dejinta danwadaagaha. Sidoo kale Itoobiya waxaa ka billowday barnaamijkii dibudejinta Godey ee mashruuca wabi Shabeelle.

Dabayaaqadii sannadkii 1974tii, Cabdiraxmaan Axmed Cali (Cabdiraxmaan Tuur) oo ahaa safiirkii Soomaaliya u fadhiyay Addis Ababa, wuxuu madaxdiisii Muqdisho u gudbiyay warbixin sirdoon oo dhammaystiran oo ku saabsan qorshaha mashruuca biyo-xidheenada wabi Shabeelle ee ay Itoobiya dib u billowday. Mashruucan oo sidaan hore u soo sheegnayba aan dan u ahayn Soomaaliya, wuxuu door aad u weyn ka qaadan lahaa horumarka dhaqaale ee guud ahaan Itoobiya, gaar ahaanna deegaanka Soomaalida (Ogaden), oo loo diyaarinayay in boqollaal kun oo dadka deegaanka ah la dajiyo dhulbeereedka dooxada webiga inta u dhaxaysa Galbeedka Godey ilaa Qallaafo. Warbixinta Cabdiraxmaan Tuur waxay soo dedejisay tabaabushihii dawladda Soomaaliya ee ahaa in mar walba dagaal lagaga hortago qorshe kasta oo wax u dhimi kara biyaha webi Shabeelle. Dhanka kale inkastoo warbixinta Cabdiraxmaan Tuur ay ku salaysnayd xog uu ka helay sirdoonkiisa, haddana ka daacad ma ahayn ee waxaa weheliyay qorshe uu la wadaagay siyaasiyiintii Soomaalilaand, oo ahaa in colaad laga dhex abuuro Soomaaliya iyo Itoobiya, dagaal ay ku jilicdona la galiyo dawladda Maxamed Siyaad Barre, si ay u helaan fursad ay ku soo ceshadaan taladii laga maroorsaday ee Soomaalilaand.

Iyadoo ka faa'iidaysanaysa dagaalkii qaboobaa ee ka dhexeeyay labadii gaashaanbuurood ee NATO iyo Warsow ee quwadihii galbeedka iyo bariga, waxay dawladdii hantiwadaagga ahayd ee Maxamed Siyaad fursad u heshay inay kaalmo militeri oo xoog leh ka hesho Midowgii Soofiyeeti iyo waddamadii kale ee ay isku bahda ahaayeen iyo waliba qaar ka mid ah Carabta.

Sannadkii 1976dii, waxay Soomaaliya gaadhsiisay ciidankeedii Xoogga Dalka in ka badan 25,000 oo askar tababaran ah, oo ku hubaysan illaa 250 taangi oo isugu jira T-34 iyo T-54/T-55 oo ah nooca taangiyada dhexe ee lagu samayn jiray Midowgii Soofiyeeti iyo waliba in ka badan 300 oo gawaadhida gaashaaman ee dagaalka ah. Ciidanka cirka oo isna aad loo abaabulay, wuxuu ku hubaysnaa konton iyo laba diyaaradaha dagaalka ah, oo labaatan iyo afar ka mid ahu ay ahaayeen Supersonic MiG 21 lagu sameeyay Midowgii Soofiyeeti.

Dhinaca Itoobiya, waxaa Sebtember 1974tii ka dhacay inqilaab militeri oo taladii waddanka kala wareegay boqor Xayle Sellase. Inqilaabka ka dib waxaa ka dhex billowday saraakiishii ciidanka ee talada la wareegay loolan iyo xukun-bursi ka dhex dhaliyay khilaaf, tafaraaruq iyo isdil. Taas oo keentay inuu kala daato ciidankii difaaca waddanka, taladiina ay jahawareerto.

Dawladdii Soomaaliya oo ka faa'iidaysanaysa awoodeeda militeri iyo tafaraaruqa ku yimid taladii iyo ciidankii Itoobiya, waxay isla markiiba billaabeen abaabul dagaal oo loogu magac bixiyay dal xorayn iyo doonis Soomaali Weyn. Ujeedada dhabta ahuse taas ka duwanayd.

Badhtamihii sannadkii 1976dii, ayuu Maxamed Siyaad Barre, gaas ciidan ah, oo loogu magac daray Jabhadda Xoraynta Soomaali Galbeed (JXSG), kula dardaarmay meesha la yidhaahdo Qorilow, oo soddon kilomitir Muqdisho u jirta, kuna sagootiyay iyagoo u sii jeeda gudaha waddanka Itoobiya. Arrintanu ma ahayn mid uu shacabka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo kan Soomaalida Itoobiya ay wax ka ogaayeen ama go'aankeeda lahaayeen. Waxayse ahayd amar uu ku soo rogay xukunkii kali taliska ahaa.

Dabayaaqadii 1976dii, waxay ciidankii JXSG dagaal kula galeen ciidamadii difaaca Itoobiya meesha la yidhhddo Laab oo ku taalla galbeedka Godey. Waxayna sidii loogu talagalay qarxiyeen biyo xidheenkii Galbeedka Godey. Bishii Juun 1977dii ayay si buuxda dagaalka u soo galeen ciidamadii xoogga dalka ee Soomaaliya, waxayna bishii Julaay qabsadeen magaalada Godey iyo degmooyin kale

oo dhawr ah. Dagaallo culculus kadib waxay ciidamadii Soomaaliya bishii Sebtembar 1977dii qabsadeen magaalada Jigjiga iyo dhulka deegaanka Soomaalida Itoobiya (Ogaden) intiisa badan.

Guushan u soo hoyatay Soomaaliya lama mahadinin ee waxaa dhakhsaba soo ifbaxay khilaaf saddex dhinac ah. Markii ay siyaasiyiintii iyo salaadiintii dhulka la qabsaday is waydiiyeen talada deegaanka, waxaa intoodii badnayd loo kaxeeyay Muqdisho, qaarkoodna waxaaba loo taxaabay xabsiga iyadoo laga cabsanayay inay meesha keenaan madaxbannaani iyo aayakatashi.

Qaar ka mid ah saraakiishii hogaaminayay siyaasadda iyo kuwii ciidanka, sida Jeneraal Matukade; G/sare Ciro; G/sare Cabdulaahi Yuusuf; G/sare Caydiid; G/sare Galaal iyo kuwo kale, oo iyana billaabay dhabarjabin dadban, si dagaalka loogu fashilo. Waxay saraakiishanu rajo ka qabeen xukunka, waxayse u arkayeen haddii lagu guulaysto dagaalka inay suurtogal tahay inuu Maxamed Siyaad taageero weyn helo, xukunkiisuna sii adkaado. Inkastoo uusan doorkoodu aad u muuqan, saraakiishii ka soo jeeday Soomaalilaand iyana door weyn ayay ka ciyaareen in lagu jabo dagaalka, oo dib looga baxo dhulkii la qabsaday.

Saraakiishii ciidanka ee talada Itoobiya la wareegay waxay qaateen, kuna soo rogeen waddanka, mabaadiida hantiwadaagga. Waxayna isla markiiba xidhiidh iskaashi la sameeyeen waddamadii bariga ee uu hogaaminayay Midowgii Soofiyeeti. Taageero fiicanna way ka heshay Itoobiya. Taasi waxay ka cadhaysiisay xukuumaddii Muqdisho, oo si aan ka fiirsi lahayn Soomaaliya uga eriday Midowgii Soofiyeeti iyo xulafadiisii shuuciga ahaydba. Waxayna isla markiiba ka soo jeedsadeen dhankii kale ee seeraha colaadda.

Ciidamadii difaaca Itoobiya oo dib isu soo abaabulay, kaashanayana taageerada xulafadooda cusub, waxay bishii Febraayo 1978dii dib ugu soo duuleen magaalada Jigjiga, oo ay qabsadeen. Waxaana ku xigay dagaallo isdabajoog ah oo Itoobiya u soo hoyiyay guulo degdeg ah. Bishii Maarso 1978dii, wuxuu Maxamed Siyaad dib u soo ceshaday ciidamadiisii galay Itoobiya intii ka soo hadhay, oo qiyaastii ka yar saddex meelood laba.

Markii laga saaray ciidamadii Jamhuuriyadda Soomaaliya dhulkii ay qabsadeen, waxay kaga tageen dhulka baadiyaha ah intiisa badan horimo ciidan ah oo loogu magac daray jabhad xorayn. Kuwaas oo jidadkii u dhexeeyay degmooyinka ku aasay miino, kana samaynayay jidgooyo.

Shacabkii deegaanka Soomaalida Itoobiya (Ogaden) oo markii horeba ay dhibaato culus ka soo gaadhay soo galiddii waddankooda ee ciidanka Soomaaliya, oo bililiqo iyo hagardaamo culus u gaystay, dagaalkuna aad u waxyeeleeyay, ayaa haddana ciidamadaasu markay qaxayeen waxay shacabkii magaalooyinka ku noolaa ku khasbeen inay raacaan oo Soomaaliya u qaxaan. Meel kasta oo ay ka baxeenna way burburiyeen wixii aysan qaadan karin ee hanti ahaa.

Qixinta shacabka dhawr arrimood oo ay ka mid yihiin kuwan soo socda ayay uga gol lahayd dawladdii Maxamed Siyaad Barre:

- Inuu dadkan soo qaxay ka helo taageero ciidan difaaca dawladdiisa haddii Itoobiya soo weerarto gudaha Soomaaliya;
- Inuu ka helo ciidan difaaca haddii xukunkiisa mucaarad kaga kaco gudaha Soomaaliya;
- In aanay Itoobiya u suurto galin fulinta mashaariicda webi Shabeelle;
- Inuu helo xoogag u diyaarsan oo mar walba uu ku khalkhal galin karo ammaanka gudaha Itoobiya;
- In ciidamada soo rogaal celiyay ee Itoobiya ay qabsadaan magaalooyin cidla ah, oo burbursan.

Sida ay Donna R. Jackson ku qortay buuggeeda *Jimmy Carter and the Horn of Africa- Cold War Policy in Ethiopia and Somalia,* waxaa muuqatay markuu Maxamed Siyaad Barre ciidamadiisa kala

baxay gobolka Ogaden bishii Maarso 1978dii ilaa bishii Agoosto 1980kii, baahi weyn oo Soomaaliya ay u qabtay kaalmo dhaqaale iyo mid militeri oo caalami ah.

Hase yeeshee waxay ahayd go'doon aan xidhiidh iskaashi la lahay xulafooyinkii waddamadii bariga iyo kuwii galbeedka midna. Soomaaliya xidhiidhkii way u jartay Midowgii Soofiyeeti, dhanka kalena Maraykanka iyo reer galbeedku waxay ku xidheen taageero ay siiyaan Soomaaliya, in marka hore Soomaaliya ay faraha kala baxdo arimaha gobolka Ogaden. Dagaalka, waxay gaashaanbuurta NATO u arkaysay xadgudub ay Soomaaliya ku samaysay sharciga caalamiga ah iyo gardaro lagula kacay arimaha gudaha ee waddanka Itoobiya. Iyadoo mar walba mudnaata ay siinayeen midnimada qaran ee Itoobiya, ayna ka dhursugayeen xidhiidh wanaagsan oo ay la yeeshaan waddanka ugu weyn Geeska Afrika.

Damacii siyaasadeed iyo duulaanadii ay ku soo qaaday dawladdii Jamhuuriyadda Soomaaliya waddanka Itoobiya, waxay horseeday dhaqaalihii waddanka oo wiiqma, tafaraaruq siyaasadeed iyo bulsho, iyo kacdoon shacab. Arrimahaas oo wadartoodu keenay burbur ku yimaadda qaranimadii Jamhuuriyadda Soomaaliya. Dumitaankaas qaranimo oo sababay kala qaybqaybsan, nac qoto dheeraaday iyo dawladnimadii oo ku dhacday boholo aad u dheer oo ay adag tahay in dib looga soo saaro.

7. Dayradii dawladdii Dhargiga

Bishii Sebtembar 1974tii wuxuu golihii ciidanka ee lagu magacaabi jiray Dhergigu si buuxda ula wareegay taladii waddanka. Hase yeeshee waxaa durba golaha dhexdiisa ka billowday khilaaf siyaasadeed oo ka dhashay weeraradii Ereteriya iyo loolan xukun doon. Waxaana saddex sano gudahood hogaanka qabtay, isla markaana la khaarajiyay dhawr hogaamiye oo kala ahaa Jeneral Aman Andom, jeneral Teferi Banti iyo Kolonel Atnafu Abate. Waxaana bishii Nofeembar 1977dii si buuxa talada waddanka ula wareegay Kolonel Mengistu Xayle Maryam.

Dawladdii shuuciga ahayd ee Dhargigu waxay halkii ka sii wadday barnaamijyadii isbaddal ee ku wajahnaa deegaanka dadka Soomaalida (Ogaden) ee uu hore u qorsheeyay imberadoor Xayle Sellasse. Hase yeeshee, wakhtiga uu talada la wareegay kolonel Mengistu Xayle Maryam, oo ay socdeen dagaallo xoog badan oo laba dhinac ah, dhanka Soomaaliya iyo dhanka Ereteriya, iyo khilaafkii gudaha oo wali cabsi laga qabay, waxaa waddanka haystay kala daadsanaan maamul iyo dhibaato dhaqaale oo weyn.

Ciidamadii Dhergiga ee ku soo noqday deegaanku waxay u yimaadeen magaalooyin cidla ah oo burbursan, iyadoo uu ku adkaaday isu socodka degmooyinka iyo waliba la xidhiidhka shacabka deegaanku. Waxaa kaloo ay la kulmeen dagaallo goosgoos ah oo shuftaysi ah. Waxyna kala hortageen weeraro xoog leh oo aan loo aabayeelayn dadkadeegaanka. Waxay si aan naxariis lahayn uga aargoosteen shacabkii tuulooyinka iyo reer guuraagii miyiga, iyagoo xataa xoolihii noolaa laayay ceelashiina sumeeyay.

Dhanka kale, iyadoo xukuumaddii Dhargigu ka faa'iidaysanaysa khilaafii ka dhex dhashay saraakiisha Jamhuuriyadda Soomaaliya intuu socday dagaalku iyo inqilaabkii dhicisoobay ee bishii Abriil 1978dii, la rabay in lagu afgambiyo xukunkii Maxamed Siyaad Barre, waxay abaabuleen jabhado hubaysan oo la dagaalama dawladdii Jamhuuriyadda Soomaaliya. Arintan oo meesha ka saartay cabsi dambe oo Itoobiya ay ka qabto weerar kale oo laga soo abaabulo Muqdisho.

Xukuumaddii Dhargigu waxay billowday dacaayad lid ku ah dadka deegaanka Soomaalida (Ogaden), oo lagu takoorayo. Waxay ku tiriyeen dadka deegaanku inay yihiin dad ajnabi ah oo si sharcidarro ah

ku soo galay, kuna jooga waddanka Itoobiya, iyagoo waliba sheeganaya in deegaanku ka mid yahay waddanka Itoobiya. Tan oo lagu tilmaami karo gaf aad u weyn oo aan marna la qaadan karin.

Markuu soo afjarmay dagaalkii shuftaysiga ahaa, deegaankuna uu xasilay horaantii sideetameeyadii, waxay xukuumaddii Dhergigu dib u billowday mashaariicdii wabi Shabeelle. Mashaariicdan oo yeeshay waji ka duwan kii hore, cidda loo qorsheeyay loogana faa'iidaynayay ma ahayn dadka deegaanka iska leh ee markii hore loogu talagalay. Waxayse dawladdii Dhargigu billowday inay deegaanka ku soo daadgurayso dad laga soo raray gobollo kale, gaar ahaan gobolkii la odhan jiray Wello ee waqooyiga Itoobiya, oo abaaro xoog luhu ka dhaceen, kacdoon shacabna ka jiray.

Dadkan la soo raray, oo qaarkood khasab lagu soo kexeeyay, waxaa la dejiyay dhul beereedkii dooxada wabi Shabeelle ee bariga iyo koonfurta degmada Godey; dooxada Faafan ee sare, dhul beereeka Jigjiga iyo meelo kaleba. Waxaa sidoo kale la dajiyay degmooyinkii iyo tuulooyinkii deegaanka oo idil.

Sannadkii 1987dii, waxay xukuumaddii Dhergigu ku soo bandhigtay dastuurkii cusbaa ee ay soo saareen ismaamul-goboleedyo cusub oo waddanka loo qaybinayo. Ismaamuladan maqaarsaarka ahaa, waxaa dhulka dadka Soomaalida ah loo qaybiyay afar qaybood oo kala ahaa: ismaamulkii Diridhabe; gobolkii Bariga Hararge; ismaamulkii Ogaden iyo gobolkii Borena. Inkastoo gobolada cusub lagu sheegay inay yihiin ismaamullo leh xukun daakhili ah, hadana ficil ahaan arintaas waxba kama jirin haba yaraatee.

Golihii shacabka ee ismaamulkii lagu magacaabay Ogaden, oo ay xarun u ahayd magaalada Godey, waxaa ku jiray Marxuum Bashiir Sheekh Cabdi, oo ahaa xubinka kaliya ee ka soo jeeday dadka gobolkaas. Xubnaha kale dhammaan waxay ahaayeen dadkii dhulka la soo dejiyay iyo saraakiil ciidanka ka mid ahaa. Gobolada kalena sidaa iyo si la mida ayay ahaayeen.

Labadii xukuumadood ee Mengistu Xayle Maryan iyo Maxamed Siyaad Barre oo labadaba ay soo foodsaareen dhibaatooyin dhaqaale, siyaasadeed iyo kacdoon bulsho, waxay u arkeen dan inay dhammeeyaan khilaafkooda. Markuu muddo socday xidhiidh dibloomaasiyadeed oo ay dilaal ka ahayd dawladda Jibouti, waxay bishii Abriil, sannadkii 1988dii, labadaa madaxweyne isku arkeen magaalada Jabuuti. Waxaanay halkaas ku kala saxiixdeed isafgarad wadareed oo ka koobnaa dhawr qodob oo ay ka mid ahaayeen: in dib loo soo celiyo xidhiidhkii dibloomaasiyadeed ee labada waddan; in la iswaydaarsado maxaabiistii dagaalka; in ciidamada laga qaado aagga xuduudka labada dal; in la joojiyo barabagaandhada lidka ku ah labada xukuumadood; in la joojiyo taageerada ururada mucaaradka ku ah labada waddan iyo in la dhiso komishin labada dhinac ah oo soo darsa sidii loo xallin lahaa khilaafka biyaha wabi Shabeelle.

Bishii Meey ee sannadkii 1987dii, siduu ahaa heshiiskii Jabuuti, waxay xukuumaddii Dhergigu ku amartay inay waddanka Itoobiya ka baxdo jabhaddii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed (SNM), oo markaas ahayd xoogga hubaysan ee ugu weynaa jabhadihii ka soo horjeeday dawladdii Maxamed Siyaad Barre. Waxayna SNM oo agabkeedii wadata si toos ah u soo gashay magaalooyinkii waqooyiga Soomaaliya sida Hargeysa iyo Burco, oo ay dagaallo culus kula galeen ciidamadii dawladda.

Maadaama ay jabhadda SNM, heshay taageero shacab oo aad u ballaadhan, way ku adkayd ciidamadii dawladdu inay kali ahaantoodu iska difaacaan. Hase yeeshee, siduu hore u qorshaystay, Maxamed Siyaad Barre wuxuu si qabiilnimo iyo waddaniyad afgobaadsi ah ku abaabulay dadkii qaxootiga ahaa ee uu waddankooda ka soo qixiyay, xeryahana uga sameeyay duleedka magaalada Hargeysa.

Dhalinyaro iyo waayeelba, raggii xeryaha qaxootiga ku jiray ayaa la hubeeyay, loona abaabulay inay dagaal kaga hortagaan jabhadda SNM iyo kacdoonka shacabka. Dadkaas qaxootiga tabaalaysan ahaa, haddana laga dhigtay gaashaanka iyagoo aan tababar ciidan lahayn, waxay la kulmeen:

- Dagaal iyo xasuuq naxariis darro ah oo laba dhan ah;
- Mucaawinadii caalamiga ahayd oo ka joogsatay, keentayna macaluul iyo cudur faafa;
- Shacabkii ay martida u ahaayeen, daris wadaaggana ahaayeen oo uu nac ka dhex abuurmay;
- Jidadkii ay u marayeen waddankooda oo ka wada xidhmay, ayna noqdeen go'doon;

Qof kasta oo waxgarad ah, oo xilligii Dhergiga joogay waddanku wuu ka dheregsan yahay xaqdaradii iyo hagardaamadii joogtada u ahayd dadka deegaanka Soomaalida ee Itoobiya.

8. Salku waa Dhanaan!

Degmada Dhanaan, ee deegaanka Soomaalida Itoobiya dhawr wax bay caan ku tahay. Waxaana ka mid ah Dhuurka Danwaa, oo dadka deegaanku aad u yaqaanno iyo maahmaahda aan hooriskeeda ciwaanka uga dhigay qaybtan oo ka mid noqday halqabsiga af Soomaaliga.

Dhanaan waxay ku taallaa weel ballaadhan oo ay ku soo daacaan laba tog, oo sameeya dooxo carasan ah, oo dadka degmadu ay sabaanno badan ka beeran jireen masago iyo dalagyo kaleba. Marka ay beeruhu soo go'aan billowga xagaaga ama horaanta jiilaalka, waxaa beeraleyda u soo masago doonan jiray dadka xoolo-dhaqatada ah, oo iyana xoolahooda u iib keeni jiray halkaas.

Waxaa kaloo jiray dadka danyarta ah, kuwa xooluhu ka dhammaadeen ee caydhtooba, kuwa agoonta ah iyo waliba kuwa doolka ah oo iyana soo hiigsan jiray halkaas xilliga beergoosiga. Dadkan danleyda ahu marka ay soo gaadhaan weelka Dhanaan, waxay saldhigi jireen dhuur caan ka noqday aagga, oo tan iyo maanta loo yaqaanno Dhuurka Danwaa.

Beesha Dhanaan waxay ahayd beeraley deggan, oo nabadda jecel. Cid kasta oo godob ka gasha Dhanaan iyo nawaaxigeeda, waxay reer Dhanaan aaminsanaayeen inay halkooda ku sugaan, waayo mar uun bay masago soo doonan, iib iyo aaqibo mid uun ama xoolo iib keeni. Ninkii ka kaaftooma doogaaddu, waa kii yimaadda diraacdii ama u soo dalandoola jiilaal daba dheeraaday. Sidaasay ku baxday maahmaahda "Sahal ninkii moodiyoow, salku waa Dhanaan". Sida weelka Dhanaan, "biyo waxay meeraanba meel godan bay isugu tagaan".

Si kastoo dadka Deegaanka Soomaalida Ogaden ay qax colaadeed ama socoto kaleba kaga tageen dhulkooda, haddana waxaan shaki ku jirin in ay dool kasta ka soo noqonayaan xilliga ay dantu kallifto ama ay daltabyo keento. Waxaa tusaale inoogu filan dadkii ka badnaa malyuunka ee la qixiyay 1978-1980 laguna ururiyay in ka badan 24 xero qoxooti oo ku kala yaallay shan gobol oo Soomaaliya ka mid ah, inay intoodii badnayd ku soo noqdeen dalkoodii, iyagoo diif iyo darxumo la luudaya, markii dawladdii Soomaaliya ay burburtay sannadkii 1991kii. Cawska jiilaal iyo ciidaada hooyaba waa lama huraan. Qof aan dal lahaynu ma dalxiiso, nin aan daltabyoonna waa nin aan dal lahayn, waxna ka dambayn.

Waddan, deegaan ama degmo waxaa si dhab ah u leh, oo aan muran ku jirin, hadba intii ku nool ee dhaqankiisa wadaagta, dhismihiisa ku hawlan, dhibkiisa u rita dhabarkooda, dheeftiisa aan saluugin, dhashoodu ay u joogto, ee ciidooda ku dhaata.

Nin aan dhulka degganayn, dad iyo duunyana ka jirin, xaqiiqada taallana aan sheeko mooyee shaahid ku arag, oo dibadda ka meerayaa, intee in le'eg ayuu xogogaal u noqon karaa marxaladda dhabta ah ee shacabku ku sugan yahay? Intee in le'eg ayuu ka danqan karaa darxumada dadka uu sheegan ay ku sugan yihiin?

Waxaa maanta ku nool waddamada reer Galbeedka (Yurubta galbeed iyo Waqooyiga Ameerika) dad tiradoodu ay ku dhawdahay rubuc malyuun oo u dhashay deegaanka. Dadkan jaaliyadaha dibadda oo dhaqaale iyo aqoonba aad uga sareeya kuwa dalka gudihiisa ku nool, waxweynna ka baddali kara xaaladda siyaasadeed, dhaqaale, aqooneed iyo bulsho ee deegaanka, waxaad moodaa inaanay intooda badanu isu xilqaamin sidii ay ahayd. Waxaana u aanaynayaa saddex sababood: koow, qaar ka mida dadka jaaliyadaha oo ay duufsatay lana safan JWXO, sidaa darteedna aan diyaar u ahayn inay ku noqdaan ama maalgashadaan waddankoodii; laba, qaar u arka inuu waddankoodu yahay Soomaaliya, oo ay waa qaxooti ku ahaan jireen, sidaa darteedna aan sheeganin, danayninna deegaankii ay ka soo jeedeen, balse daneeya arimaha Soomaaliya; saddex, qaar rumaystay dacaayadaha xunxun ee beenta ah ee laga fidiyay deegaanka, sidaa darteedna isu arka in aanay lahayn dal ay ku noqdaan.

Waxgaradka waddaniga ahu waa kan mudnaanta koowaad siiya danta guud ee dadkiisa, waa kan si dhab ah u qiimeeya xaqiiqada jabada reerka taalla. Waa kan hantidiisa gashada dalkiisa, ee u faa'iideeya dadkiisa. Waa midka uga faa'iideeya aqoontiisa kuwiisa u baahan. Waa kan ka war haya xaaladda siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho ee dadkiisa. Beentu raad ma leh, runtuse way raagi doontaa. Sahal ninkii moodayoow, salku waa Dhanaan!!

III. LABADA KEE DAW AH

9. Xoriyad-doon mise xaq-duudsi

Jabhadda Waddaniga Xoraynta Ogaadeenya (JWXO) waxay ka mid ahayd ururadii siyaasiga ahaa ee markii la aasaasayay isbahaysiga EPRDF sannadkii 1989kii loogu yeedhay inay ka mid noqdaan isbahaysiga cusub. Hase yeeshee, JWXO way ku gacan-saydhay baaqaasi loo soo jeediyay. Waxayna JWXO, oo aan xoog, xoolo iyo xeelad midna hayn, ku hanjabtay in aanay ciidamada EPRDF gali karin dhulka Soomaalida Ogaden. Markii EPRDF waddanka qabatay bishii Meey 1991dii JWXO wali bannaankay ka joogtay siyaasadda Itoobiya. Waxaana labadii kursi ee golaha wakiilada ay Soomaalidu ku lahayd la siiyay markii dambe JXSG, oo gacmo furan ku soo dhawaysay.

Diidmada JWXO ee ka mid noqoshada EPRDF waxaa sababteeda ugu weyn iska lahaa hoosaasintii Jabhadda Xoraynta Dadka Ereteriya (EPLF), oo markaa gacan saar la lahaa EPRDF, isla markaana u tabaabushaysanayay khilaaf mustaqbalka ka dhex dhasha iyaga iyo EPRDF. Talagalka EPLF wuxuu ahaa inay mar kasta haysato xoog bannaanka ka jooga EPRDF oo ay u adeegsan karto inay ku carqaladayso. Waxayna shaxda u degeen JWXO iyo waliba Jabhadda Xoraynta Oromiya (OLF), oo ay u arkayeen xoogag ay ku cabudhin karaan EPRDF si ay danahooda uga fushadaan. Labadubana way ku dheceen dabinkii EPLF.

Tan labaad waxay ahayd JWXO oo aan haba yaraatee u diyaarsanayn loolan siyaasadeed. Ma jirin hoggaan iyo hawl-wadeen ururs an oo isku xidhan, mana aysan lahayn barnaamij siyaasadeed oo qeexan. Gudaha waddanka kuma aysan lahayn kaadir iyo xubno toona, waxayse ka koobnayd koox yar oo ku kala firidhsan waddammo kala duwan oo dalka dibadiisa ah.

Tan saddexaad xubnaha JWXO mabda'ahaan isma raacsanayn. Isku afkaar (ideology) ma ahayn. Waddaniyaddu isku meel kama joogin. Kooxdaas waxaa ugu firfircoonaa Maxamed S. Doolaal, oo ka mid ahaa aasaasayaashii, u ahaana afhayeen iyo xoghayaha arimaha dibadda. Doolaal wuxuu ahaa muwaadin Itoobiyaan ah oo u dagaalamaya xaqa dadkiisa, inkastoo ay waayadii dambe wax iska baddaleen aragtidiisa. Taas waxaa markhaati ka ahaa markii kooxdii uu hogaaminayay Cabdullaahi Xasan ay kaga dhawaaqeen Ururka Dib-u celinta Qaxootiga Ogaden magaalada Nayrobi, bishii Diseembar 1985tii, sannad ka dib aasaaskii JWXO, oo Doolaal uu taageeray qayb-ahaan fikirka Cabdullaahi Xasan iyo kooxda uu hogaaminayay. Wuxuuna qabay in waddanka lagu noqdo, oo laga

baxo qaxootinimada. Hase yeeshee, qaar badan oo ka mid ah xubnahaas JWXO waxay aaminsanaayeen in aanay Itoobiyaan ahayn haba yaraatee.

Hase yeeshee, dabayaaqadii 1991dii, waxaa shirweyne abaabulay koox yar oo isku tilmaantay inay matasho JWXO. Waxayna shir ku qabteen hayjadda la yidhaa Gerigo'an. Shirkaas oo ay ka qayb galeen dhawr boqol oo qof, lagama soo qayb galin intii badnayd salaadiintii, aqoonyahanadii, siyaasiyiintii iyo waxgaradkii kale ee waddanka sii joogay. Waxaase isu yeedhay kooxo wadaaddo ah, qaar ka tirsanaan jiray jabhadihii hore ee Soomaaliya iyo ururadoodii bulshada iyo waliba saraakiil ka tirsanaan jiray xukuumadihii Soomaaliya.

Shirweynahaas Gerigo'an waxaa lagu magacaabay hogaamin iyo gole-dhexe oo cusub, oo u badan dad aan haba-yaraatee aqoon iyo waayo-aragnimo u lahayn nidaamka dawliga ah iyo siyaasadda Itoobiya midna. Intooda badanna waxay aaminsanaayeen in aanay Itoobiyaan ahayn.

Taageero dadweyne oo ballaadhan ayay heshay JWXO, haba u badnaato taageeradaasu mid ku salaysan caadifad qabiile. Waxayna aqlabiyad weyn ku guulaysatay doorashooyinkii deegaanka Soomaalida ee 1992dii. Taas oo fursad u siisay inay soo dhisaan, hogaamiyaanna dawladdii ugu horaysay ee laga dhiso deegaanka.

Ka hor sannadguuradii 1aad ee xukuumaddoodii, waxaa durba soo ifbaxay mabda' la'aanta; qorshe la'aanta; siyaasad xumada; qaybsanaanta; musuqmaasuqa; isgaraborodka iyo waddaniyad la'aanta JWXO. Qaar waxay billaabeen inay boobaan miisaaniyaddii ugu horaysay ee ay maamulaan; qaar waxay billaabeen loollan xukun oo dhexdooda ah; qaar waxay billaabeen hub ursi iyo dagaal u xaydxaydasho; qaar waxay billaabeen inay yidhaahdaan afti xoriyad baanu ka qaadaynaa, intay dad tabaalaysan oo qaxootiyadii Soomaaliya ka yimid soo ururiyeen.

Magaalada Godey, oo markaas ahayd magaalo-madaxda deegaanka, dadka ku noolaa in ka badan boqolkiiba sagaashan waxay ahaayeen dad ka soo noqday qaxootiyadii Soomaaliya. Dadkaas oo intooda badan soo noqday iyagoon waxba wadan, hantina aysan ka soo horayn, waxay ku noolaayeen silic iyo darxumo. Xataa biyo nadiif ah oo ay cabbaan ma aysan haysan, meel ay u hoydaan iska daaye. Waxay mar labaad qaxooti ku noqdeen waddankoodii ay u soo hiloobeen.

Dabayaaqadii 1994tii, waxay JWXO xubnaheedii baarlamaanka deegaanka ku qalqaalisay inay go'aamiyaan afti xoriyad oo laga qaado dadweynaha deegaanka. Waxayna iclaamiyeen dagaal ay la galayaan dawladda Itoobiya. Waxaa kaloo ay heshiis gacansaar dagaal la galeen ururkii Al-Itixaad al Islaami, oo markaa ka jiray deegaanka, iyagoo isu tusayay inay taageero dhaqaale iyo militeri ka heli doonaan dunida Islaamka, gaar ahaan ururada siyaasiga ah ee Carbeed.

Waxay gudaha waddanka JWXO ka billowday olole ku dhisan barabagaandho been ah iyo ballanqaadyo aan sal lahayn oo ku salaysan qabyaalad, oo ay ku dagaal galinayso dadkii dacdaraysnaa ee ka soo noqday qaxootiyada iyo reer guuraagii. Waxay billaabeen jidgooyo, dil iyo dabarjar ay ugu magac dareen dal xorayn. Way kala dileen dadkii walaalaha ahaa, oo ay ugu yeedheen magac dil iyo dabaqoodhi. Waxay duudsiyeen xaqii uu shacabku u lahaa nabad inuu ku noolaado oo horumar tiigsado. Waxay kala dileen dawladdii iyo dadkeedii. Waxay isku dileen reerihii meesha wada degganaa.

In ka badan laba iyo toban shir, oo qaarkood qarsoodi ahaa, oo uu Ra'iisal wasaare Meles Zenawi si gaar ah ula yeeshay qabaa'ilka Ogaadeenka, waxay noqdeen kuwo aan midho dhalin. Sababta ugu weyn ee loogu guulaysan waayayna waxay ahayd ololaha JWXO. Waxaa inta badan shirarka imanayay ama hor ordayay waxay ahaayeen kuwa taageera JWXO ama qaar ay wali ku qufulan tahay barabagaandhadii ololayaasha dagaal galin ee dawladihii Soomaaliya. Kuwaas oo badankoodu aan odorosi karin cawaaqibka ra'yigooda gaabanu yeelan karo hadda iyo mustaqbalkaba.

Sidoo kale waxay JWXO olole siyaasadeed oo taageero raadis ah ka billawday dunida Islaamka, gaar ahaan waddamada Carabta. Ololayaashaas oo noqday kuwo ay si weyn ugu hungoobeen. Qaar ka mid ah waddamada Islaamka iyo kuwa Carabtu waxay hore u taageereen dagaaladdii ay Soomaaliya soo qaadday 1964kii iyo 1977dii. Waxaa kaloo ay taageereen dagaalkii gobanimodoonka Ereteriya.

Markuu dhammaaday dagaalkii qaboobaa ee waddamada Bariga iyo Galbeedku, way isbaddashay guud ahaan siyaasaddii caalamku, gaar ahaanna middii Carabta ee ku wajahnayd qaaradda. Loolankii saddex-geesoodka ahaa ee Islaamka, Israa'iil iyo Reer Galbeedku ay ugu jireen qaaradda Africa, wuxuu yeeshay waji cusub.

Way burburtay Soomaaliya oo ka mid ahayd Jaamacadda Carabta iyo Ururka Waddamada Islaamka. Rajada ay leedahay inay soo noqoto Soomaaliya oo midaysan, oo leh xukuumad waxtar ahuna waa mid gabaabsi ah. Waxayna hadda Carabtu u hanqaltaagayaan inay kasbadaan waddanka Itoobiya. Itoobiya oo ah waddan weyn, ilo dhaqaale oo dihinna leh, wuxuu saamayn siyaasadeed oo xoog leh ku leeyahay qaaradda Afrika iyo caalamkaba. Si ay Itoobiya u kasbadaan Carabtu waxay billaabeen: inay ku dhiiri-galiyaan hantiilayaashoodu inay maalgashadaan waddanka; inay iskaashi dhaqaale, dhaqan iyo siyaasadeed la yeeshaan dawladda iyo inay kasbadaan shucuubta, gaar ahaanna kuwa Muslimka ah, oo saami weyn ka ah dadweynaha waddanka. Shucuubtaas ay Carabtu doonayo inay door ka ciyaaraan Carabaynta iyo Islaamaynta mustaqbalka Itoobiya, waxaa ka mid ah dadka deegaanka Soomaalida. Sidaa darteed, siyaasiyiinta Carabtu waxay hadda doorbidayaan midnimada iyo xasiloonida Itoobiya.

Xurguftii iyo saymihii colaadeed ee dhexmaray waddanka Itoobiya iyo gobolkii ka goostay ee Ereteriya bishii Meey 1998dii, wuxuu fursad siiyay JWXO iyo JXO, oo labaduba ka helay Ereteriya taageero saanad dagaal. Ereteriya markii lagaga adkaaday dagaaladii intii u dhaxaysay Meey 1998 illaa Juun 2000, ee si laxaad leh loogu jabiyay goobo badan sida Badhimme iyo Zala Anbassa, dagaalkii waxaa lagu xakameeyay dadaal dibloomaasiyadeed oo caalami ah.

Markay ogaadeen hogaamiyayaasha Ereteriya in aanay dagaal fool ka fool ah isaga caabiyi karin xoogagga Itoobiya, waxay billaabeen inay adeegsadaan kooxihii ay hore u marin habaabiyeen ee JWXO iyo JXO iyo waliba kuwo ay ka abaabuleen gudaha Soomaaliya. Iyadoo danta ay ka leeyihiin ay tahay inay xabbadda iska wareejiyaan, oo Itoobiya ku furaan furimo dagaal oo kale, iyana ay nabad helaan. Waxayna aad u kordhiyeen taageeradii saanad ee ay siinayeen kooxahaas.

Waxay JWXO ku maangadday shacabka erayga "xoriyad" baan idin gaadhsiinaynaa. Cidda wax xoraynaysaa horta iyadu xor ma tahay? Bal aan iswaydiinnee, waa maxay macnaha xoriyad? Falsafad ahaan waxaa jira xoriyadda togan iyo tan taban. Labadan falsafadood ee is barbar socda, midiba si gaar ah ayay u fasiraysaa macnaha ay u yeelan karto xoriyaddu qof ama bulsho.

Haddiise aan soo koobno macnaha "xoriyad," sida uu qoray qaamuuska af Ingiriiska ee Oxford, waa xaqa uu qofku u leeyahay inuu yidhaahdo ama sameeyo waxa uu isagu rabo ee sax u arko ama inuu diido waxa uu khalad u arko. Waxaa jira afar xoriyadood oo qof kastaa u baahan yahay, xaqna u leeyahay. Waana: xoriyadda aasaasiga ah, oo ah ka xoroobidda baahida, gaajada, cudurka, hoy la'aata, jahliga, iwm; xoriyadda cabsida sida, in laga xor yahay cabsi, oo qofka naftiisa, qoyskiisa, hantidiisa, iwm. uusan waxba uga cabsanayn; xoriyadda cibaadada sida, inuu qofku cibaadaysan karo, bari karo baranna karo diintiisa, dhisan karo goobo cibaado isagoo aan waxba ka cabsanayn; iyo tan afraad oo ah xoriyadda fikirka sida, inuu qofku cabbiri karo, qori karo rayigiisa, shir qaban karo, ra'yi diidi karo, yeeli karo, bannaanbixi karo, iwm. isagoo aan waxba ka cabsanayn.

Qoraagii George Orwell wuxuu wax ka qoray "erayada aan macnaha lahay" ee "sida joogtada ah loogu adeegsado saaxada siyaasadeed. Erayada ay ka midka yihiin "xoriyad," "dimoqraadiyad" iyo caddaalad," wuxuuna ku nuuxnuuxsaday Orwel, in wax badan si aad u xun loo adeegsaday ilaa ay

noqdaan kuwo uu ka lumo macnihii ay asal ahaan lahaayeen. Aragtida Orwel, erayada siyaasadda “waxaa aalaaba loo adeegsadaa si khiyaano loo badheedhay ah.” “Iyagoon erayadooda macne dhab ah siinayn, siyaasiyiintu waxay daboolaan xaqiiqada, oo waxay dadkana hadba ku qufulaan macnaha ay iyagu rabaan inay erayga siiyaan, si eraygaas loo waafajiyo hadba wixii ay rabaan ama aysan rabin. Dhanka kalena, xaqiiqo foolxun ayaa ku hoos qarsoonaan karta hadalka ulakaca ah ee aan macnaha lahayn.”

Colaad aan laga fiirsan iyo dal baan dagaal ku xoraynaynaa waan wada ogsoon nahay halka ay maanta dhigtay Jamhuuriyaddii Soomaaliya ee xorta ahayd. Hogaanku inta uusan colaad qaadan ee dadkiisa dagaal u horkicin, waxaa habboon inuu daraasad ku sameeyo ilihiisa iyo awoodiisa dhaqaale iyo militeri. Waxaa habboon inuu qiimeeyo taageerada uu u heli karo gude iyo dibadba, siyaasad ahaan, dhaqaale ahaan iyo dibloomaasiyad ahaanba. Waxaa habboon inuu qiimeeyo wakhtiga ay qaadan karto colaadaasu iyo natiijada ka soo bixi karta. Waxaa habboon inuu isu miisaamo nabad iyo colaad mida uu ku faa’iidi karo dadkiisu. Waxaa habboon inuu qiimeeyo goorta iyo sida ugu habboon. Haddii aan qiimayntan la samayn, si cilmiyaysanna aan loo samayn, waxay keeni kartaa cawaaqib xumo meel dheer tagta.

Dhawr iyo tobankii sano ee la soo dhaafay, ee ay JWXO dadka u lushay balagga xoriyadda, maxaa la isu waydiin waayay meesha ay dadka iyo dalka u wadaan? Dadka iyo dalka yaa xoriyaddii ka qaaday? Yaa colaadda keenay muskooda? Dadka soo qaxay ee aanay wali diiftii ka bi’in, yaa u durbaan tumay? Yaa cabsida, agoonta, caydha, lugooyada, iwm. keenay?

Colaadanu wax dhib ah, habayaraatee, kuma hayso JWXO oo dhammaantood ku nool Yurubta Galbeed, Waqooyiga Maraykanka, Ereteriya iyo Bariga Afrika. Sidoo kale dhib culus kuma hayso dawladda Itoobiya iyo jabhadda talada haysa ee EPRDF. Wuxuuse dhibka ugu badan ku dhacayaa waa shacabka saboolka ah iyo reer guuraaga deegaanka.

Sannadkan dhexdiisa, waraysigii uu siiyay gudoomiyaha JWXO, Maxamed Cumar Cusmaan, telefishinka Universal, wuxuu wariyuhu waydiiyay: “Waxaan ognahay inaad janaraal ka ahayd Soomaaliya, haddana waxaad gudoomiye u tahay jabhad ka dagaalanta Itoobiya, hadaba labadaa waddan midkee baad tahay?” Wuxuu ku jawaabay gudoomiyaha JWXO, “Waxaan ahay waddankii aan dawladdiisa janaraalka ka ahaa.” Hadday sidaas tahay, muxuu u faragalinayaa arrimaha waddan kale, oo nabad ah, dawladna leh, muu kala celiyo kuwiisa labaatanka sano is dilaya ee dawlad la’aanta ah?

Halganku ma hadba in waddan kale loo adeegaa? Shalay waxaa weerarka soo abaabulayay Muqdisho, maantana waxaa weerarka soo abaabulaya Asmara. Maxaa la isu waydiin waayay danta ay naga leeyihiin ama aan ka helayno? Muxuu yahay waxa aan Muqdisho iyo Asmara ka helayno, ee aan ka waynay Addis Ababa? Xaggee bay jirtaa maslaxada dadka iyo dalku?

Waxaa muuqata inaanay JWXO iyo kuwa ay dabada la gashayba xoriyad la doonayn dad iyo dal toona, balse ay ujeedadoodu tahay inay duudsiyaan xaqa uu dadka iyo dalku lahaa.

10. Itoobiyada Maanta

Kala furfurashadii xulafadii Waarso iyo burburkii Midowgii Soofiyeeti ee dabayiil, wuxuu horseeday isbaddal taariikhi ah, oo dhan walba saamayn weyn ku yeeshay taariikhda guud ahaan caalamka oo idil.

Markuu hoos u dhacay dhaqaalihii Midowga Soofiyeeti, oo lagu wado in ay sabab u ahaayeen dagaalkii Afghanistaan iyo musuqmaasuqa oo gaadhay heer aad u xun, ee uu billowday inuu kala furfurto, waxay keentay in xukuumadihii xulafada la ahaa ee shuuciga ahaa ay iyana kala daataan. Sidoo kale waxaa dhammaaday dagaalkii qaboobaa, oo keenay waddammo badan oo garabka saari

jiray Bariga ama isku tilmaami jiray inay dhexdhexaad yihiin inay go'doon noqdaan amaba la faquuqo.

Dawladdii Dhergiga ee Mengistu Xayle Mariyam, oo ka mid ahayd xukuumadihii yaraa ee qaaradda Afrika sida weyn ugu tiirsanaa Midowgii Soofiyeeti, kama aanay soo hadhin masiibadii qaadday kuwii ay jeelka ahaayeen.

Jabhaddii Xoraynta Dadka Tigraay (TPLF), oo laga aasaasay bishii Febraayo sannadkii 1975tii gudaha waddanka Itoobiya, waxay muddo dheer la soo dagaalamaysay xukuumaddii Dhergiga. Waxaana garabkii ciidan ee jabhadda u suurto gashay inay gobolka Tigraay intiisa badan gacanta ku dhigaan sannadkii 1987dii.

Markuu dhicisoobay inqilaabkii la rabay in talada lagaga qaado Mengistu Xayle Maryan 1989kii, jahawareer siyaasadeed iyo ciidanna uu ku yimid waddanka, waxay ciidamadii TPLF ku soo siqeen gobolka Shewa oo ay taageero badan ka heleen shacabka.

In kastoo TPLF oo iskaashi la lahayd EPLF ay qaban kartay waddanka, haddana waxay u soo bandhigtay qawmiyadihii kale afkaarteedii ahayd in la mideeyo shucuubta Itoobiya, si wadajir looga hortago xukunkii Dhergiga. Waxaana ku soo biiray laba jabhadood oo kale kuwaas oo aasaasay isbahaysiga Jabhadda Kacaanka Dimoqraadiga ee Dadka Itoobiya (EPRDF).

Markii ciidamadii Dhergiga lagu jabiyay goobo badan oo dagaal, bishii Meey 1991, Mengistu Xayle Mariyam wuxuu ka cararay waddanka, waxaana taladii waddanka la wareegay isbahaysigii EPRDF.

Bishii Luulyo 1991dii, kalfadhigii koowaad ee wakiilada qawmiyadaha Itoobiya ee lagu qabtay Addis Ababa waxaa lagu gaadhay go'aan taariikhi ah, kaas oo lagu aasaasay dawladaha deegaanada qawmiyadaha Itoobiya. Waxaana isla kalfadhigaasi 21kii Luulyo madaxweynaha waddanka loo doortay Meles Zenawi, oo ahaa hoggaamiyihii TPLF iyo isbahaysiga EPRDF ee talada qabtay.

Dadka Tigray, oo dhibaato iyo silic aad u weyn, mid dabiici ah iyo mid dadsamee ahba iyo duqayn aan loo aaba yeelin ka soo maray xukunkii Dhergigu, waxay diyaar u ahaayeen inay shucuubta kale ee Itoobiya wax la qaybsadaan, oo nabad kula noolaadaan. Tanina waa midda sababtay inay ansixiyaan madaxbannaanida gobolkii Ereteriya.

Daraasad iyo la tashi shucuubta oo badan kadib, waxaa 8dii Diseembar 1994tii la ansixiyay dastuurka cusub ee Itoobiya. Dastuurkan, oo noociisa oo kale aan hore looga hirgalin qaaradda Afrika, wuxuu dadweynaha Itoobiya siinayaa xuquuq aad u ballaadhan. Qodobka 39aad ee dastuurka xidhiidhka Itoobiya wuxuu u dhigan yahay sidan:

Qodobka 39aad
Xuquuqda Qawmiyadaha, Jinsiyada iyo Dadyawga

1. Qawmiyad, Jinsiyad iyo Dad kasta oo ka mid ah Itoobiya wuxuu shuruud la'aan xaq u leeyahay aayakatalintiisa, oo ay ka mid tahay xuquuqda gu'itaan.
2. Qawmiyad, Jinsiyad iyo Dad kasta oo ka mid ah itoobiya wuxuu xaq u leeyahay in uu ku hadlo, qoro oo horumariyo afkiisa; in uu muujiyo, hormariyo oo fidiyo dhaqankiisa; iyo in uu dhawrto taariikhdiisa.
3. Qawmiyad, Jinsiyad iyo Dad kasta oo ka mid ah itoobiya wuxuu xaq u leeyahay in uu si buuxda isu maamulo, taas oo ay ka mid tahay xaqa in uu ka samaysto deegaanka uu dego hay'adaha dawliga ah iyo inuu wakiilo ku yeesho dawladda deegaanka iyo tan Xidhiidhka.
4. Xaqa aayakatalintu, oo ay ka mid tahay xuquuqda gu'itaan ee Qawmiya, Jinsiya iyo Dadyow kasta, wuxuu taabbagal noqon:

a. Marka dalabka gu'itaan ay ansixiyaan aqlabiya ah saddex meelood laba ee xubnaha golaha sharci dajinta (baarlamaanka) Qawmiyadda, Jinsiyadda ama Dadyawga ay khusayso;
b. Marka Dawladda Xidhiidhku ay abaabusho afti dadweyne oo go'aanka golahaas khusaysa, taas oo dhacaysa saddex sano gudahood laga billaabo marka ay hesho go'aankaas;
c. Marka dalabka gu'itaan uu taageero inta badan codbixinta aftidu;
d. Marka Dawladda Xidhiidhku ay awoodda ku wareejiso golaha Qawmiyadda, Jinsiyadda ama Dadyawga codka ku bixiyay in ay go'aan; iyo
e. Marka qaybinta hantida loo sameeyo sida uu qeexayo sharcigu.

5. "Qawmiyad, Jinsiyad ama Dadyow" waxaa dastuurkan loola jeedaa, bulsho si weyn u wadaagta dhaqan ama caado ka dhexeeya, af ay wadaagaan, iimaan ama aqoonsi kale oo ka dhexeeya, saamayn nafsiyeed, oo ku wada nool deegaan cayiman oo ay aqlabiyad weyn ka yihiin.
   (Qodobkan, qoraaga daraasaddan ayaa ka soo tarjumay nuqulka af Ingiriiska ee dastuurka xidhiidhka Itoobiya).

Inkastoo aanay sahlanayn kasbashada xuquuqda sharciga ah ee ku xusan dastuurku, hadana waxay yididiilo galinaysaa, kalsoonina siinaysaa shucuubtu inay isku-tashadaan, danahooda qawmiyad ama dad ahaanna ay u xaytaan siday iyagu ku meelmarsan lahaayeen.

Haddiise aan u soo noqonno deegaanka Soomaalida (Ogaden), baahida dhabta ah ee dalka iyo dadku ma in hadda la helo madaxbannaani siyaasadeed baa? Haddiiba la helo middaas, miyuu jiraa wax damaanad qaadaya in dadku heli doono xoriyad? Dadka deegaanku ma isku raacsan yahay middaas? Inuu deegaanku gaar u istaago, iyo inuu xuquuqdiisa ku helo Itoobiya, midkee dan ah wakhtigan? Su'aalahan haddii aan rabno inaan ka jawaabno, waxaan u baahan nahay inaan darisno baahida dhabta ah ee dadkeenna; inaan ogaanno heerka bislaanshahooda siyaasadeed; illaa xadka ay isku kalsoonidooda iyo midnimadoodu joogto. Sidoo kale waxaan u baahan nahay inaan darisno waxyaabaha aasaaska u ah horumarka dhaqaalaha waddan.

Waxaa jira noocyo badan oo heshiis, midu waa heshiiska qoran ee sharciga ah. Waxaa kaloo jira heshiisyo aan la soo bandhigin, balse si dadban loo dhaqan galiyo. Heshiisyada aan sida badheedhka ah loogu soo bandhigin dadweynuhu waxay u badan yihiin kuwa siyaasadda, oo aalaaba dhexmara axsaabta siyaasiga ah ama hogaamiyayaasha ay taladu ka go'do ee ummadda.

Inkastoo talada waddanka guud ahaan ay hayso jabhadda EPRDF, haddana waxaan ogsoon nahay in ay jifo u tahay TPLF oo ka mid ah isbahaysigaasu. Jabhaddan dambe, oo lahayd askunka isbahaysiga talada haya, waxay intii u dhaxaysay Juun 1991dii illaa Diseembar 1994tii xoog saartay inay kasbato axsaabtii iyo hogaamiyayaashii bulshada ee dadka deegaanka Soomaalida. Marka aan dib u xasuusto erayadii madaxweyne Meles Zenawi, waxaa ii muuqatay sida uu ururkiisu u danaynayay inuu iskaashi iyo waxwada qabsi la yeesho dadka deegaanka Soomaalida (Ogaden). Walow ay luntay fursaddaas qaaliga ahaydu, haddana mar walba waxaa jira fursado kale. Cid kasta oo xukun haysaana waxay u baahan tahay saaxiibbo badan, umase baahna cadow badan. Siyaasadduna sideedaba, ma lahan cadow ama saaxiib joogto ah.

Maanta, Itoobiya waa xoogga ugu kurkurka roon Geeska Afrika. Labadii eef ee la soo dhaafayna waxay samaysay isbaddal la tilmaami karo oo dhan kastaba ah. Beesha caalamkuna arimaha Geeska Afrika waxay uga dambeeyaan, kalana tashataa dawladda Itoobiya. Waxay Itoobiya door weyn ka ciyaartaa xal u raadinta mushkiladaha Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo midda Daarfuur iyo Koonfurta Suudaan. Waxay qayb libaax ku leedahay la dagaalanka argagixisada ee Geeska Afrika oo ay gacansaar kula leedahay waddamada reer Galbeedka gaar ahaanna Maraykanka.

Waxaa xaqiiqo ah waddamada yaryar ee dariska la ah Itoobiya, sida Ereteriya, Jabuuti, Soomaaliland, Puntland ama Soomaaliya in aanay samayn doonin horumar dhaqaale, mid siyaasadeed ama mid dibloomaasiyadeed, haddii aanay ku tiirsanayn waddanka Itoobiya.

Mar haddii kuwii madaxbannaanida siyaasadeed haystay danahoodu uusan xor ka noqon karin Itoobiya, sidee kuwo Itoobiyaan ahu xor uga noqon karaan?

11. Dawladda Deegaanka Soomaalida

Deegaannada qawmiyadaha ee la aasaasay waxaa ka mid ahaa Deegaanka Qawmiyadda Soomaalida, oo dhul ahaan ah kan labaad ee ugu baaxadda weyn Itoobiya, tiro dad ahaanna dabcan kan saddexaad ama afraad noqonaya. Waana markii ugu horaysay taariikhda Itoobiya, ee dadka Soomaalida ahu ay helaan aqoonsi buuxa iyo deegaan midaysan oo iyagu is maamulaan.

Inkastoo nidaamkan cusubu uu u danaynayo dhammaan dadyowgii dulmanaa ee Itoobiya, haddana waa mid si gaar ah fursad weyn u ah dadka Soomaalida ah, oo iyagu, xuquuq kale iska daaye, aan hore u haysanin xataa aqoonsi inay muwaadiniin Itoobiyaan ah yihiin. Haba sii kala badsadaane dadyowga kale ee Itoobiya, waxay heli jireen xaqooda illaa xad. Dadka Soomaaliduse waxay Itoobiya ka ahaayeen culays dulsaar ah oo aan haba yaraatee wax xuquuq ah ku lahayn waddankooda.

Colaad ay bulsho ku dalbayso madaxbannaani siyaasadeed, waa tallaabada ugu dambaysa ee ay bulsho qaadan karto, marka ay u aragto in aanay caddaalad ahayn xukuumadda dhexe ee ay ka tirsan tahay. Waxaase taas ka horeeya in bulshadaasu marka hore ay samayso koboc garasho; in ay yeelato qaab-dhismeed dawladeed; in ay samaysato adeegyada bulsheed; in ay dhisato kaabayaasha dhaqaale; iwm.

Wuxuu yidhi John F. Kennedy, oo madaxweyne ka noqday waddanka Maraykanku, “Kuwa diida inuu kacaan bulsho ku yimaaddo si nabad ah, waxay khasab ka dhigaan inuu yimaaddo kacaan colaadeed.” Waxaan shaki ku jirin in siyaasadda Xukuumadda Xidhiidhka Itoobiya ee wakhtiganu uu diyaar u yahay kacaan bulsho oo nabadeed.

Tan iyo intii la aasaasay deegaanka qawmiyadda Soomaalida, inkastoo ay jireen colaado, qas iyo lugooyo dhinacyo kala duwan ka imanayay, oo looga dan lahaa in lagu wiiqo horumarka dadka deegaanka, haddana waxaa la qaaday tallaabooyin wax ku ool ah. Wuxuu deegaanku yeeshay gole baarlamaan iyo qaabdhismeed dawli ah; wuxuu yeeshay xuduuddo calaamadsan iyo khariidad deegaan; wuxuu yeeshay qaab-dhisme gobollo iyo degmooyin; wuxuu yeeshay magac, astaan qaran, calan, summad gaadiid, iwm. Kuwaas oo dhammaantood muujinaya kacaan bulsho oo ku yimid si nabad ah.

Waa xaqiiq in deegaanka Soomaalidu uu wali ka dambeeyo deegaannada qawmiyadaha kale ee Itoobiya, hase yeeshee marka la isbarbardhigo labadii eef ee ay jirtay Dawladda Xidhiidhka Dimuqraadiga ee Itoobiya iyo nus qarnigii ka horeeyay, waxaa muuqada isbaddal horumarineed oo laxaad leh in deegaanku sameeyay. Adeegyada bulshada sida, waxbarashada, caafimaadka, isgaadhsiinta, ammaanka, sharciga, maamulka iyo gaadiidka waxaa kor loo soo qaaday 2000%. Qaybaha kale ee horumarinta dhaqaalaha sida, beeraha, xoolaha, biyaha, jidadka, ganacsiga, iwm. aad ayaa loo fidiyay, waxayna ku socdaan dardar, qof kasta oo danaynaya deegaanku uu ku diirsan karo.

Waxaan akhristoow ku waydiiyay:
Nin dugsi idiin dhisahayoo dhaxanta kuu diidi
Oo inaad degtaan idinla raba dagalka ciidiinna
Iyo nin kaaba duminahayoo dibadda kuu saari
Oo inaad dalambaabidaan yahay dubaaqiisu
Dadoow waa su’aal dihine labada kee daw ah?

12. Hoygoo nabadaa lagu hodmaa

Sida uu qoray Abraham J. Muste, oo u doodi jiray xuquuqda dadka Maraykanku, “Ma jiro dariiq loo maro nabaddu, nabaddu waa jidka.” Nabadu waa jidka aasaaska u ah ee loo maro dhammaan isbaddalka horumar ee ay bulsho hiigsan karto. Haddii aanay nabadi jirin horumar ma jirayo, rajaduna way gabaabsidaa. Rajada oo ah ilaha quwadda aadanaha, marka ay dad ka lunto, wuxuu dadkaasu halis u yahay inuu jabo oo tirtirmo.

Benjamin Franklin, oo ka mid ahaa raggii aasaasay waddanka Maraykanku wuxuu yidhi, “Marnaba ma jirin dagaal fiican ama nabad xun.” Nabaddu inay fiican tahay waa arrin dadka dunida oo idil ay isku raacsan yihiin. Haddii ay dadyow iyo dalal inaga tayo iyo tiro badanu u arkaan in danahooda ay nabad iyo maslaxo ku xaliyaan, maxaa inoo diiday inaan dadkeenna tabaalaysan u danayno, oo masloxo iyo nabad wax ku xallinno.

“Waxaa uun hadda lala amakaagay dareenka ah inaan dagaal waxba lagu xallin karin; in dagaal lagu guulaystaana waa uun masiibo la mid ah in lagu guuldaraysto.” Waxaa sidaa qortay Agatha Christi, oo ahayd qoraa macruuf ah oo u dhalatay waddanka Ingiriiska. Dhan kasta oo maanta laga eego, waxaa si bayaan ah u muuqata in aanay colaad dan u ahayn dadka deegaanka Soomaalida (Ogaden), wax ugu xalismayaana uusan jirin.

Waxaa laga hayaa Dwight D. Eisenhower, oo ahaa jeneraal ciidamada Maraykanka, markii dambana madaxweyne noqday, inuu yidhi, “Waxaan raadinaynaa nabad, annagoo ogaannay inay nabaddu tahay jawiga xoriyadda.” Marka uu gurigu nabad yahay wax kasta oo kale waad raadin kartaa. Xoriyad tan ugu weynu ma ahan madaxbannaanida siyaasadeed. Jamhuuriyaddii Soomaaliya, sida aan wada ognahay, waxay madaxbannaani siyaasadeed heshay 1960kii, maantase lama odhan karo waa dad iyo dal xor ah. Cid kale oo dibadda uga timid ma jirtee, talaxumo, tafaraaruq iyo kali talis ayaa xoriyadoodii ka qaaday. Filasuufkii Ralph Waldo Emerson ayaa qoray, “Guulaha dhabta ah ee waaraa waa kuwa nabadda, ee ma ahan kuwa colaadda.”

Inkastoo halgankeenna la afduubay, waynu soo marnay xilliyo dagaalku munaasib inagu ahaa, oo aynaan xurmo iyo xuquuq ku lahayn Itoobiya. Waayo aan xataa la inoo aqoonsanayn inaan wadani nahay. Wakhtigaasu wuu dhammaaday, waana taariikh aan soo marnay oo xusid iyo xusuus mudan. Hase yeeshee, waxaa loo baahnaa inaan ula soconno hadba dabaylaha siyaasaddu dhanka ay u rogmadaan. Xilliga jiilaalka ee barafka weynu ka dhaco waqooyiga Kanada, geed kama jabo kaymaha xilli walba cagaaran ee halkaas ku yaalla. Marka uu fuulo baraf badan oo culus, way seexdaan si aanay u jabin. Marka uu jiilaalku dhammaado ee barafku kaco, iyana way toosaan oo billaabaan inay magoolaan. Dhirtaasu way yaqaanaan sida looga samatabaxo masiibooyinka xilliyada.

Albam aan ugu magac daray “Saadaal” oo heeso baraarujin nabadeed ka kooban, ayna qaadday fannaanadda caanka ah ee Khadiija Foodeey Nuur, oo aan ka soo qaatay ciwaanka qaybtan, yaan ka soo xigtay heesihiisa mid ka mid ah baydkan:

Gabay horaa wuxuu yidhi
Good iyo ninkii ganay
Gabankiyo masaartii
Ninba gocay xusuustii
Gaddoodii miyaan nahay
Garashadii ma suushoo
Waxaa hadhay gabbaankii
Gurigaaga lama gubo
Gacalkaaga lama dilo
Nabsigu marna wuu gudaa

Marna gabbalku kama dhaco

GABAGABO

Cabdullaahi Macallin Axmed (Dhoodaan) oo ah filusuuf, siyaasi, horseedkii jacburka iyo halabuurka usha u haya gabayga Soomaalidu, wuxuu caan ku yahay naqdiga siyaasadda ee uu gabaygiisa ku cabiro hadba xaaladda markaa lagu jiro iyo waliba odoros mustaqbalka.

Isagoo Dhoodaan ka gilgilanaya faragalinta iyo marinhabaabinta siyaasadeed ee dawladihii Jamhuuriyadda Soomaaliya ay ku hayeen Itoobiya, gaarahaana deegaanka Soomaalida (Ogaden), wuxuu marar badan tix iyo tiraabba kaga hadlay goobo badan fagaare iyo faqba. Waxaa ka mid ah gabayadiisa naqdiga ah midka lagu magacaabo, “Ogaadeen damiin kama dhigtee yaa u dirsaday hawsha?” Gabaygan oo dambeedka hooriskiisa aan ciwaan uga dhigay daraasaddan, wuxuu macallinku tixo shaqalka miisaankoodu yahay 21/22, oo ah kan ugu tayada sareeya ee gabayga, ku faaqiday duufsiga, dibindaabyada, damaca, dabinka, danaysiga, dabamaryada, daw iska xoorka, durbaan beenaadka, digdiglaynta, is dabameerka, kala dilka iyo isku dilka, docadocaysiga, duulaanka, xaq daboolka, dacaayadda, dafiraadda, dal xoraynta, is dirka, kala duska, iwm. ay dawladdii Jamhuuriyadda Soomaaliya kula kacday dadka deegaanka Soomaalida (Ogaden). Luggooyadii sooyaalka ahayd ma dhammaanin ee wajigii iyadoo baddalatay ayay wali halkii ka sii socotaa.

Hadday JWXO dan u hayso dadka ay sheegan inay matasho, waxay qiimayn lahayd halka ay marayso noloshoodu maanta, taas oo qofkii wax garanayaa uu qiyaasi karo inay ku dhawdahay inuu tirtirmo jiritaankoodu. Waxaa meel kasta oo Geeska Afrika ah, maanta daadsan haween iyo caruur agoon ah, qoysas soo barakacay oo meel ay u ciirsadaan jirin, dhallinyaro dhibaataysan oo miyigii iyo tuulooyinkii ay ku noolaayeen ka soo qaxay.

Siyaasadda deegaanka Soomaalida (Ogaden) waxay haatan gashay marxalad cusub oo aad uga duwan kuwii waayadii la soo dhaafay oo idil. Waxaa kacay jiil cusub oo aan marnaba yeelayn in ay dameeri dhaan raacday noqdaan, balse diyaar u ah in ay doortaan sidii dantooda ah. Aamus adigu, oo aniga i dhagayso anaa kuu hadliye haatan way dhammaatay. Xoriyadda la raadinayaana waxay iman doontaa marka muwaadin kasta codkiisa la maqlo oo la tixgeliyo. Shacbigana dhibkii wuu soo karay, wuxuuna billaabay inuu bislaado oo kala garto dantiisa iyo danaha kale ee maqaarsaarka ah.

Taariikhdu way xusi ee marnaba illoobi mayso qof kastaa wuxuu galay iyo wuxuu guday. Kii danta dadka iyo dalka horseedaa wuu heli abaalkiisa, kii hagardaamo u gaystaana, kas iyo kamma midkuu doono ha ka ahaadee, isna wuu heli doonaa waajibkiisa.

BIBLIYOGRAAFIYA

Audi, Robert. Gen. Editor. 1999. *The Cambridge Dictionary of Philosophy*, Cambridge, Cambridge University Press.

Bestman, Catherine. 2000. *The Struggle for Land in Southern Somalia*, Haan Publishing.

Davidson, Basil. 1991. *Africa in History*, New York, Simon & Schuster Paperbacks.

Diamond, Jared. 2005. *Collapse: How Societies Choose to Fail or Succeed*, New York, Penguin Books.

Dowden, Richard. 2008. *Africa: Altered States, Ordinary Miracles*, London, Portobello Books Ltd.

Friedman, George. 2009. *The Next 100 Years: A Forecast for the 21st Century*, New York, Anchor Books.

Galal, Musse H. I. 1968. *The Terminology and Pactice of Somali Weather lore, Astronomy and Astrology*, Mogadishu, Ministry of Education.

Gibbons, Ann. 2006. *The First Humans: The Race to Discover our Earliest Ancestors*, New york, Anchor Books.

Gurhan, M.A. 2000. *Garnaqsi: Maansadii Cabdullaahi M. A. Dhoodaan*, Addis Ababa, Artistic Publishers.

_____ 1994. *Shaqo iyo Isku Tashi*, Addis Ababa, Guardian.

Hourani, Albert. 1991. *A History of the Arab People*, London, Faber and Faber Limited.

Jackson, Donna R. 2007. *Jimmy Carter and the Horn of Africa- Cold War Policy in Ethiopia and Somalia*. Jefferson, NC, McFarland & Company, Inc., Publishers.

Keller, Edmond J. 1988. *Revolutionary Ethiopia- From Empire to People's Republic*, Bloomington, Indiana University Press.

Lata, L. 2004. *Horn of Africa as Common Homeland*, Waterloo, ON, Wilfrid Laurier University Press.

Lewis, I. M. 1980. *A Modern History of Somalia*, Oxford, Oxford University Press.

Marcus, Harold G. 2002. *A History of Ethiopia*, Berkeley, University of California Press.

Masudi, Ali Abul Hassan 956. *Meadows of Gold and Mines of Gems* (1841 reprint), London, The Oriental Translation Fund of Great Britain and Ireland.

Mazrui, Ali. 1986. *The Africans: A Triple Heritage*, Little Brown and Co.

Meredith, Martin. 2006. *The State of Africa: A History of Fifty Years of Independence*, London, The Free Press.

Moyo, Dambisa. 2009. *Dead Aid: Why Aid is not Working and How There is Another Way for Africa*, London, Penguin Books.

Mutwa, Credo. 1986. *Let Not My Country Die*, Pretoria, United Publishers International.

Orwel, George. 1946. *Politics and the English Language*, an essay, London

Rotberg, Robert I. 2005. *Battling Terrorism in the Horn of Africa*, Washington, D.C., Brookings Institution Press.

mgurhan@live.com